‘Waa mid ka mid ah diiwaanka buugaagta guulaystay ee abid’
Daily Telegraph

YAA

Hab Cajiib ah

QAATAY



Oo loo maareeyo isbaddalka

BURCADKAYGII?

Shaqadaada iyo noloshaada

DR SPENCER JOHNSON

Hordhaca W/Q: KENNETH BLANCHARD Ph.D.

Waa qoraagii wax ka qoray buuggii loogu
iibsashada badnaa ee Maareeyaha Hal Daqiiqo

DR. YAXYE Y. XASAN

YAA

Hab Cajiib ah

QAATAY

Oo loo maareeyo isbaddalka

BURCADKAYGII?

Shaqadaada iyo noloshaada

DR SPENCER JOHNSON

Waxa turjumay:

DR. YAXYE Y. XASAN

YAA QAATAY BURCADKAYGII?

Xaquuqda Daabacadda © Yaxye Y. Xasan 2019.

Buuggan lama daabacan karo, lamana badsan karo, iyada oo aan oggolaansho laga haysan turjumaha buuggan. Xuquuqda turjumi ddu waa ay dhawrantahay.

Waxa Tifaftirey: Cabdiwahaab M. Raabbi (Gadhle)
Naqshadaynta jaldiga: Muhammed Amein

Waxa turjumay:
YAXYE YAASIIN XASAN (DVM)



NAADIGA CURIS

Kobcinta Akhriska, Qoraalka iyo Suugaanta

KALA SOO XIDHIIDH

Address: Kebele: 18, HN: 0223, Jigjiga, Ethiopia.

Mobile: 00251-9-15-74-85-34 / 00251-9-38-89-12-08

E-mail: Yaxye24@gmail.com

October, 2019.

TUSMADA BUUGGA

AFEEF.....1

HIBAYN.....2

MAHADNAQ.....3

HORDHACA TURJUMAHA.....4

SHEEKADA KA DANBAYSAY SHEEKADA.....8

KULAN.....14

SHEEKADA: YAA QAATAY BURCADKAYGII?.....17

WADA SHEEKAYSI: ISLA MAALINTII.....58

LADH.....82

AFEEF

“Ama afeef hore yeelo ama adkaysi dambe.”

_Maahmaah Soomaaliyeed

Akhristayaasha buuggan waxa aan ugu cudurdaaranayaa wax allaale wixii khalad ah ama iin ah ee ku jira buugga, haddii ay tahay xagga turjumidda, isku xidhka sheekada iyo qalad xuruftaba inay raallinoqdaan ayaan ka dalbanayaa maadaama uu yahay buug aan turjumo kii igu horreeyay. Isku day kasta khalad lagama waayo.

Waxa aan kale oo ka cudurdaaranayaa xagga eray-bixinta tusaale ahaan: erayga Chees; waxaa Af-soomaali ugu dhaw waa erayga Burcad inkasta oo erayga Farmaanjo la dhaho haddana anigu waxa aan door biday in aan Erayga Cheese ku macneeyo Burcad sababta oo ah erayga farmaanjo waa eray Talyaani ah.

HIBAYN

Buuggan waxa aan u hibaynayaa gabadhayda yar ee aan Aabbaha u ahay Hodman Yaxye Yaasiin, Aabbo macaan soo barbaar oo noqo tii anfacda diinteeda, dalkeeda iyo dadkeeda. Waxa aan sidoo kale u hibaynayaa Hooyaday macaan Xaawo Faarax Cadde oo aan aad u jeclahay, Hooyo farxad, cibaado iyo camal suuban ku noolow adduunkan, aakhirana Janno fardowso ayaa aan Eebbe weyne kaaga baryayaa.

"Si kasta oo ay wadadu u dheertahay haddii aadan istaagin bar dhammaadka wadada waad gaadhi."

_Dr. Yaxye Y. Xasan

Jigjiga, Somali State, Ethiopia.

MAHADNAQ

Mahad idilkeed waxaa iska leh Allaah, oo ii fududeeyay turjumidda buuggan xikmadda qaaliga ahi ku jirto, si ay bulsho waynta soomaaliyeed uga faa'iidaystaan. Waxa aan sidoo kale mahad u celinayaa dhammaan qofkasta oo igu dhiirrigaliyay turju midda buuggan iyo qofkasta oo igala qayb qaatay qorista iyo soo saarista buuggan oo ay ugu horreeyaan labadayda waalid, walaall aday iyo saaxiibbaday.

Waxa aan sidoo kale mahad ballaadhan oo aan la soo koobi karin ujeedinayaa dhamaan xubnaha naadiga kobcinta akhriska, qoraalka iyo suugaanta ee Curis. Waxa aan sidoo kale u mahadnaqayaa Yaxya Xasan Aadan (Bulshaawi) iyo Axmednuur Deeq Daahir oo iga caawiyay dib u sixidda buugga.

Waxa aan mahad gaar ah oo ka soo baxday dacalka wadnahayga u gudbinayaa xaaskayga macaan Sabriin Maxammuud Caanoole oo uuna la’aanteed suurragal ahaan lahayn, waqtiga aan iyada la qaadan lahaa na ugu deeqday buuggan.

Ugu dambayntii, waxaa kale oo aan u mahadnaqayaa qofkasta oo si toos ah iyo si dadbanba igala qayb-qaatay buuggan in uu soo baxo.

HORDHACA TURJUMAHA

“Dawaco meeshay macal uga barato ayay macaluul ugu dhimataa.”

_Maahmaah Soomaaliyeed

Adigu hadda waxa aad gacmahaaga ku haysaa buuggaygii, indhah aagu waxa ay ku dhaygageen akhrinta qoraalkayga, waadna ku faraxsantahay in aad akhrisid, Balse ha ku akhriyin buuggan meel sawaxan badan, tag meel daggan oo leh neecow udgoon, jawigaas daggan ha kuu weheliyo sharaab qaboow, intaas ka dibna dhuux erayada buugga ku qoran.

Sababta igu dhalisay in aan luuqadda Af-Soomaaliga ku turjumo buuggan waxaa weeyaan, buuggan yar waxaa ku jirta xikmad aad u weyn oo ka hadlayso isbaddalka, waxaa la daabacay in ku dhow 26 million oo nuqul, waxaa kale oo lagu turjumay in ka badan 37 luuqadood.

Aniguna runtii waxa aan ka cabsan jiray isbaddalka, markii aan is idhaahdo naftaada waa in aad isbaddal muuqda ku samayso, maskaxdayda waxaa ku soo dhici jirtay erayo taban sida: filasho taban, cabsi, naxdin, iyo in aan ka walwalo mustaqbalka igu soo food leh.

Taasina waxa ay igu sababi jirtay in aan faraha ka qaado wixii aan rabay, in muddo ah ayaan dhaqankaas lahaa nasiib-wanaag se maalin ayaan tagay maktabad si aan u soo iibsado buug ka

hadlayo isbaddalka shaqsi ahaaneed, buuggii iigu horreeyay e, indhahaygu qabtaan oo isbaddal ka hadlayo waxa uu noqday buuggan “Yaa Qaatay Burcadkaygii”, waliba waxaa isoo jiitay cinwaan hooseedka buugga, "Hab cajiib ah oo loo maareeyo isbad dalka shaqadaada iyo noloshaada."

Islamarkiiba, buuggii waa aan soo iibsaday waa aana wada akhriyay saddexda qaybood e, uu buuggu ka koobanyahay. Xaqi iqdii, anigu waxa aan ka helay faa’iido aad u badan, waxa aan fahmay macnaha isbaddalka iyo sirta guusha in ay tahay isbaddalka.

Maalin isniin ah urrur ayaa igu soo marti qaaday tababar dhiirrigalin kaasi oo lagu qabtay xarunta dhallinyarada. tababarkaaas waxaa loo qabatay arday dugsiyada dhexe sannad kan imtixaanka shahaadiga marayso, laba mowduuco ayaa la igu yidhi oo dhiirigalin ah ardayda u soo diyaari, anigu labadii mawduuc waxa aan ka dhigay:

1. Sidee ayaad u noqon kartaa arday guulaysta?

2. Maxaa ku diidan in aad guulaysato?

Markii aan ardayda hor istaagay waxa aan wajiyadooda ka dareemayay farxad, yididdiilo, iyo rajo wanaagsan, inta aanan bilaabin mawduuc ayaan waraqado cad-cad u qaybiyay ardaydii, dabeed codh dheer ayaan ku idhi “Arday walibow bogga hore

waraaqda waxa aad ku qortaa waxa aad rabto in aad mustaqbalka noqoto? Bogga dambe waraaqdana waxa aad ku qortaa waxaa kuu diidan in aad guulaysato, waliba hal weedh ku soo koob?”

Natiijadii iga soo baxday faalladii ardayda waxa ay noqotay:

Su’aasha bogga hore

Arday kasta waxa uu rabay bulshada in uu magac iyo maamuus ku yeesho, nolol wanaagsan, cibaado suuban, awlaad baari iyo dhaqaale fiican na in uu yeesho.

Su’aasha bogga dambe

Ardaydii waxa ay u qaybsameen lix qaybood:

1. 65% waxa ay waraaqda bogga dambe ku qoreen Isbaddal la’aan
2. 15% waxa ay waraaqda bogga dambe ku qoreen Cabsi
3. 10% waxa ay waraaqda bogga dambe ku qoreen Quusasho
4. 5% waxa ay waraaqda bogga dambe ku qoreen Dib-u dhigasho
5. 3% waxa ay waraaqda bogga dambe ku qoreen adkaysi la’aan
6. 2% waxa ay waraaqda bogga dambe ku qoreen wahsi

Faallada ardayda waxaa iga soo baxay ina isbaddalku yahay seeska, sirta iyo udub dhaxaadka nolosha guul farxad iyo badhaadhe lehna lagu gaadho, halka isbaddal la'aantu tahay bar billowga fashilka, walwalka iyo jahwareerka nolosha.

Haddaba ma tahay qof rabo sirta guusha? Ma tahay qof doonayo inuu ka gudbo dhibaatooyinka soo foodsaaro noloshisa? Ma ka walwalsha mustaqbalkaaga? Ma tahay qof rabo inuu naftiisa isbaddal ku sameeyo? Ma tahay qof rabo inuu isbaddalka maareeyo?

Jawaabaha su'aalahaas waxaa ka heli marka aad akhriso buuggan, iyo sirta guusha oo ah in aad filato ama naftaad isbaddal ku samaysid. runtii buuggani waa buug kooban oo aad isaga oo idil ku akhriyi kartid muddo kooban, laakiin waxa aan kugula talin lahaa in aad muddo toddobaad ah ku akhrisid si aad u fahantid dulucda sheekada buuggan.

Akhris xiiso leh.

_Yaxye Yaasiin Xasan (DVM)

SHEEKADA KA DANBAYSAY SHEEKADA

Hordhac W/Q: Kenneth Blanchard PH.D.

Anigu waxa aan aad ugu riyaaqasanahay in aan idiin sheego ‘sheekada ka danbaysay sheekada’ Yaa Qaatay Burcadkaygii? sababta oo ah, waxa ay ka dhigantahay in buuggan hadda la qoray iyo in aan dhammaanteen heli karno si aan u akhrisanno, ugu raaxaysanno iyo in aan la wadaagno dadka kale.

Kan waa shay aan rabay in aan arko inay dhacdo illaa markii aan ka maqlay Spencer Johnson sheekadiisa muhiimka ah sannad ka hor, inta aannaan wada qorin buuggayagii Maareeyaha Hal Daqiiqo.

Waxa aan xasuustaa sida aan uga fikirayay sida ay sheekadan u wanaagsantahay iyo sida ay ii caawin lahayd aniga laga billaabo ammintaas.

Yaa Qaatay Burcadkaygii? waa sheeko ku saabsan isbaddal ka dhacay Xero luuq-luuq leh gudaheed waxaa jiray afar noole oo laysu madaddaalinayo laguna raadinayo ‘Burcad’ – burcadka waxaa lagu matalayaa wixii aan rabno in aan haysanno nolosheenna haddii ay ahaan lahayd shaqo, xidhiidh, lacag, guri wayn, xorriyad, caafimaad, magac, ruux xasilan ama xataa waxqa badka sida orodka iyo ciyaaridda golf-ka.

Midkasta oo innaga mid ahi waxa uu leeyahay fikir ugaar ah oo ku saabsan waxa uu yahay burcadku, waan raadsanaa burcadka maxaa yeelay annagu waxa aan aaminsanahay burcadku inuu nagadhigayo kuwa faraxsan, haddii aan helno, had iyo jeer waxa aannu ku tiirsannahay burcadka haddii aannu wayno burcadka, ama nalaga qaato, Waxaa nala soo dersaysaya musiibo.

Xerada luuq-luuq sheekada ku jirta waxa ay u taagantahay meesha aad waqtiga ku qaadatid marka aad raadinayso waxa aad adigu rabtid. Waxa ay noqon kartaa ha'yadda aad u shaqaysid, bulshada aad ku dhex nooshahay ama xidhiidhka aad leedahay xagga noloshaada.

Waxa aan uga sheekeeyay sheekada burcadka e aad imminka akhriyaysid si hadal ah adduunka oo dhan, ka dibna dadka intooda badan waxa aan ka maqlaa arrimo ku saabsan isbaddalka iyo saamaynta ay ku yeelatay naftooda.

Rumayso ama ha rumaysan, sheekadan yar waxaa lagu ammaanay xirfada kaydsashada, guurka iyo nolosha!

Midka mid ah tusaalayaasha badan ee xaqiiqda nolosha waxa ay ku dhacday Charlie Jones, oo ah saxafi magac iyo maamuus leh oo ka shaqeenayay NBC-TV, kaasi oo daaha ka qaaday maqlidda sheekada “Yaa Qaatay Burcadkaygii?” in ay u badbaadisay xirfaddiisa.

Shaqadiisa saxafi ahaan waa u gaar, laakiin mabbaadii'da uu ka bartay waxaa isticmaali kara qof kasta.

Waa kan wixii dhacay: Charlie aad ayuu u dadaali jiray waxa uu sameeyay shaqo aad u wayn wuxuu na baahin jiray oradka iyo bootinta billowgii ciyaaraha Olympic, sidaas-darteed, aad ayuu u yaabay wuuna murugooday markii maareeyihiisu uu u sheegay in laga baddalay showgiisi oradka iyo bootinta, loona baddalay ciyaaraha dabbaasha iyo muquurashada olympic-kada soo socota.

Sidoo kale ma uunan garanaynin ciyaaraha lagu qoray, deedna intuu aad isugu buuqay ayuu dareemay inuu yahay qof aan la aqoonsanayn. Wuu cadhooday. Waxa uu yidhi: sidani caddaalad ma aha! Cadhadiisii waxa ay billowday inay saamaysay shay kastoo wanaagsan oo uu horrey u sameeyay.

Dabadeed, wuxuu maqlay sheekada “Yaa Qaatay Burcadk aygii?”

Intaas ka dib waxa uu yiri naftayda ayaan ku qoslay waxa uuna baddalay hab dhaqankiisi. waxa uu xaqiiqsaday maareeyihiisu inuu hadda “Qaatay Burcadkiisii” sidaas awgeed isagu wuu laqab sadayWaxa uuna bartay labadii ciyaar ee cusbaa, geeddi-socodka hawsha gudaheeda ayuu ka helay samaynta shay cusub in ay kadhigtay in uu dareemo firficooni ama dhallinyarnimo.

Waqti aan dheerayn ayuu maareeyihiisu xaqiiqsaday hab dhaqank iisa cusub iyo awooddiisa, isla markii ba waxaa lagu qoray boos fiican. waxa uu gaaray guulo farabadan oo uusan gaarin waligii. intaas ka dib wuxuu horkacayay isbahaysiga warbaahinta ee kubbada cagta.

Taasi waa mid ka mid ah sheekooyinka nolosha ee dhabta ah e aan ka maqlay saamaynta sheekadan ku leedahay dadka – laga soo billaabo nolosha shaqadooda illaa nolosha jaceylkooda.

Anigu waxa aan rumaysnahay in sheekadan gudaheeda ay xigmad adagi ku jirto “Yaa Qaatay Burcadkaygii?” dhawaan waxa aan siiyay nuqul ka hor tafaftirka buuggan qof kasta (in ka badan 200 qof) kuwaas oo u shaqaynayay shirkaddayada. Sabab?

Sababta oo ah sida shirkad kasta aynna u rabin inay badbaado oo kaliya mustaqbalka, laakiinse ay u rabto inay guulaysato, horummarinta iyo tababarrada "Blanchard" si joogta ah ayay isku baddalayaan. Waxa ay qaadayaan “burcadkeenna.” Kolkii hore annagu waxa aan dooni jirnay shaqaale daacad ah, maanta se waxa aan rabnaa kuwo dabacsan, kuwaas oon ka xigsan dadka kale (dariiqada loo sameeyo shayga halkan.)

Isbaddalka nolosha waxaa lagu suureeyaa sida biyaha-cadi waqti waliba isu-baddallo midabkoodu, ayay shaqada noloshuna noqon karaysaa mid leh: walwal, ilamaa dadku ay yeeshaan waddo ay ku

fiiriyaan isbaddalka kaasi oo ka caawiya in ay fahmaan micnaha isbaddalka. U gudagal sheekada Burcadka.

Markii aan u sheegay dadka arrimo ku saabsan sheekada iyagu waxa ay akhriyaan "Yaa Qaatay Burcadkaygii?" adigu waxa aad dareemi in aad iska saarto awoodda taban inay billaabatay. Qofkasta oo ka socda waax kasta waxa ay iigu mahadceliyaan buugga waxa aynna ii sheegaan sida uu u caawiyay iyo isbaddalka ka muuqda shirkadda oo ah iftiin caynba-cayn ah. I aamin, sheekadan gaaban wax ay qaadanaysaa waqti yar si loo akhriyo laakiin saamaynta ay leedahay ayaa ah mid qotodheer.

Marka aad sidaa u rogtid bogga ugu horreeya, waxa aad arki doontaa saddexda cutub ee buuggani ka kooban yahay. Cutubka kowaad, Kulanka, waa wada hadalka u dhexeeya arday-hore oo isku fasal ahaan jiray kuwaas oo kawada hadlaya isbaddalka ku dhacay noloshooda. Cutubka labaad, sheekada Yaa Qaatay Burcadkaygii?. Oo ah ubucda buugga. Cutubka saddexaad, Wada-sheekaysi, waxa uu ka hadlayaa sheekadan sida ay muhiimka u tahay iyo habka ay u isticmaali karaan dadku, inta u dhexaysa shaqadooda iyo noloshooda.

Qaar ka mid ah akhristayaasha buuggan waxa ay doorbidaan in aannay wada akhrinin sheekada illaa dhammaadka, iyaga oo aan fahan-buuxa ka haysannin micnaha sheekadan; Halka qaarka kalena ay ku raaxaystaan akhrinta illaa wada sheekaysiga raacsan

sheekada, sababta oo ah, waxa ay kor u qaadaysaa fikirkooda ama sida ay naftooda iyo marxaladdooda ugu dabaqi lahayeen waxa ay barteen. Si kastaba, waxa ku rajaynayaa mar waliba oo akhrisid: Yaa Qaatay Burcakaygii? Inaad ka heli shay cusub oo waxtar kuu leh,

Sida aniga igu dhacday, taasi oo kaa caawin doonta sida aad u maarayn lahayd isbaddalka, isbaddalkaas oo sabab kuu ah inaad guulaysato, shaykasta ood go'aansato guusha adiga ayaa leh.

Waxa aan kuu rajaynayaa inaad ku raaxaysan doontid waxa aad sheekada ka barato, waxa kale oo aan kuu rajaynayaa wanaag badan.

Xusuuso: la soco burcadka!

_Ken Blanchard

San Diego

KULAN
Chicago

Maalin axad ah oo cadceeddu aad u kulushahay Chicago waxaa ku kulmay arday horray isku fasal u ahaan jiray si ay u wada qadeeyaan, ardaydan hore waxa ay ka soo qayb galeen ayaa ahayd xalfada dib-u-midowga ardayda dugsiga sare ee habeen hore dhacday, waxa ay doonayeen in ay ka sheekaystaan wax ku dhacay qofkasta noloshiisa. Ka dib kaftan fiican iyo cunto wanaag san, waxa ay ku nagaadeen wado sheekaysi xiiso gaar ah leh.

Angela, taasi oo noqatay qofka ugu caansan dadka fasalka ayaa tidhi, "noloshu xaqiiqdii waxa ay soo saartay kala duwanaasho hadday sidaad tahay waxa aan u fikirayaa markii aan dhiganaynay dugsiga. Wax badan ayaa isbaddalay."

“Haa; waa-saas,” Nathan ayaa ku warceliyay. waxa ay ogaayeen oo ay ka dharagsanaayeen in uu ku biiray ganacsiga reerkooda, kaas oo si fiican u shaqeenayay waxaa kale oo uu ka mid ahaa bulshada illaa inta ay ka xasuustaan. Sidaas-darteed aad ayay u yaabeen markii uu isagu ka damqaday. Waxa uu wayddiiyay “Laakiin, waad ogtihiin sida annagu aan u rabin inaan isbaddal samaynno marka walxuhu is baddalaan.”

Carlos ayaa yidhi, “Anigu waxa aan u malaynayaa in aynnu iska caabinno isbaddalka sababta oo ah waxa aan ka cabsannaa isbaddalka laftiisa.”

“Carlos, waxa aad ahaan jirtay kabtanka kooxda kubbadda cagta,” Jessica ayaa tidhi. “Anigu wali kumaan fikirin in aan kaa maqli in aad wax ka tidhi cabsida!”

Dhammaan way wada qosleen. Waxa aynna xaqiiqsadeen in ay jihooyin kala duwan mareen – laga billaabo shaqada guriga illaa maareeye shirkad weyn – laakiin waxa ay wadaagayeen dareen isku mid ah.

Qof kasta waxa uu isku dayay sida uu u maareeynlahaa isbaddalka aan la filayn ee ku dhacayay sannaddadii dhawaa, dhammaantood waxa ay qireen in aynan wax aqoon ah u lahayn waddada fiican ee loo maareeyo isbaddalka kadiska ah.

Intaas ka dib Micheal ayaa yidhi, “Anigu waxa an ka cabsan jiray isbaddalka. Marka isbaddal wayn ku yimaaddo ganacsigeena ma aannaan garanaynin waxa aan samaynaynno iyo wax kale, ka dibna waan khasaari jirnay uun.”

“Sidaas bay ahayd,” waxa uu intaa ku daray, “Illaa goortii aan maqlay sheekadan yar ee cajiibka leh taas oo baddashay wax-walba.”

“Sidee?” Nathan ayaa wayddiiyay.

“Hagaag, sheekadu waxa ay baddashay waddada anigu aan ka eegi jiray isbaddalka, intaas ka dib, arrimuhu si degdeg ah ayay iigu hagaagaan - xagga shaqada iyo noloshayda.”

“Dabadeed, aniga ayaa u dhiibay sheekada dhowr qof oo shirkaddayada ka mid ah iyaguna waxa ay u sii dhiibeen qaarkale markiiba ganacsigaannagu aad buu u fiicnaaday, sababta oo ah dhammaan annagu waxa aan la qabsannay sida wanaagsan ee la isku baddalo. Sidayda oo kale, dad badan ayaa sheega in ay sheekadani ka caawisay noloshooda.”

“Waa sheekadee?” Angela ayaa wayddiisay.

“Waxaa la dhahaa, “Yaa Qaatay burcadkaygii?”

Kooxdii ayaa wada qoslay. “Anigu waxa aan jacelahay in ay diyaartahay sheekadu,”

Carlos ayaa yidhi, “Waxa aan kaa codsanayaa in aad nooga sheekayso sheekada.”

“Hubaal,” Micheal ayaa ku warceliyay. “waan ku faraxsanahay inaan idinka sheekayo – waqti-dheer ma qaadanayso .” ka dib wuu billaabay:

SHEEKADA: YAA QAATAY BURCADKAYGII?

Bari hore waxaa jiray, dhul aad u fog dhulkaas waxaa ku noolaa afar noole oo yar-yar waxa ay raadin jireen burcad mar allaale markii ay quutaanna waxa ay ahaayeen kuwo faraxsan.

Labo waxa ay ahaayeen Jiirar waxaana lagu magacaabi jiray “Sniff” iyo “Scury” labada kalana binu'aadam yar-yar ayaa ay ahaayeen – wax aynna la'ekaayeen abuur ahaan (dhumuc ahaan) jiirarka, laakiin wax ay u ekaayeen una dhaqmayeen sida binu’aadamka. Waxaa lagu magacaabi jiray “Hem” iyo “Hew”.

Sababtoo ah dhumucdooda oo yar, ma aha kuwo si fudud lagu arki karo waxa ay samaynayaan afartoodu. Laakiin haddii aad ugu u fiirsato ood u soo dhawaato, waxa aad ogaani shay la yaabka leh.

Maalin kasta Jiirarku iyo binu’aadamka yar-yar wax ay waqtiga ku qaataan xeryad luuq-luuq leh iyaga oo raadinaya burcad gooni u ah.

Jiirarka, Sniff iyo Scurry, waxa kaliyo oo aynnan lahayn maskax, laakiin waxa ay lahayeen dareen fiican, waxa ay raadini jireen oo ay jeclaayeen burcadka adag inay cunaan, sida jiirarku had iyo jeer sameeyaan.

Labada binu’aadamka ah, Hem iyo Haw, waxa ay isticmaali jireen maskaxdooda, taasi oo ka buuxday afkaarro taas oo sabab u

ahayd in ay raadsadaan burcad aad u kala duwan – Waxa ay rumaysanaayeen taasi inay dareensiin farxad iyo guul.

Inkasta oo ay kala duwan yihiin jiirarka iyo binu'aadamku, haddana wax ayay ka midaysan yihiin: subax kasta, midkasta oo iyaga ka mid ah waxa ay gashanayeen dharkooda oradka iyo kabahooda oradka, waxa aynna ka tagi jireen guryahooda yar-yar, waxa ay aadi jireen illaa xerada luuq-luuqa leh iyaga oo ka jirinaya burcadkoodii ay jaclaayeen.

Xerada luuq-luuqa leh waa meel sida looga soo baxo ay adagtahay, qolal bay leedahay, qolalkaas qaar waxaa yaallay burcad aad u macaan. Sidoo kale waxaa ku yaalla waddooyin madow iyo surinno kugu ridaya meello aan la fahmaynin. Waa meel aad u dhib yartahay in qofkasta ku lumo.

Si kastaba ha ahaatee, labada binu’aadamka e, yar-yari, Hem iyo Haw waxa ay isticmaali jireen habab kala duwan waxa ay kalsooni ku qabeen awoodda ayku fikirayaan iyo waxa ay wax ka barteen waayo'aragnimadoodii, laakiinse mararka qaarkood wa xa ay isku qaldaan caqiidooyinkooda iyo caddifadooda.

Ugu dambeyntii waddada dhexdeeda waxa ay ka heleen waxa ay raadin jireen – midkasta wuxuu helay burcad u khaas ah ee xarunta Burcadka C.

Intaas ka dib, subax kasta jiirarka iyo binu’aadamka yar-yar waxa ay ku labisan jireen dharka oradka ka dibna waxa ay aadi jireen xarunta Burcadka C.

Sniff iyo Scurry waxa ay si joogta ah u kacayeen subax kasta xilli hore, waxa ay u ordi jireen xerada luuq-luuq leh, Iyaga oo marayo jid isku mid ah.

Marka ay yimaadaan xarunta, jiirarku waxa ay iska bixiyaan kabahooda orodka, ka dibna waa ay isku xidhaan oo qoortooda ayaa ay sudhaan – si haddii ay u baahdaan ay si dhaqso ah u heli karaan, ka dib waxa ay ku raaxaystaan cunista burcadka.

Billawgii Hem iyo Haw waxa ay si doo kale aadi jireen illaa iyo xarunta Burcadka C subax kasta waxa ay ku raaxaysan jireen luqmad dhadhan leh ee cusub.

Intaas ka dib, binu’aadamkii yar-yari waxa ay samaysteen jidad kala duwan oo geeya xarunta Burcad C.

Hem iyo Haw waxa ay soo kici jireen maalin kasta xilli dambe, labbisaaddana way ku yar daahi jireen ka dib waxa ay aadi jireen xarunta Burcadka C. Intaas ka dib, waxa ay aqoon u lahayeen halka burcadku yaallo iyo sida loo tagi karo halkaas.

Fikir kama haystaan halka burcadku ka yimid, ama cidda dhigtay burcadka halkaas. Waxa ay u malaynayeen in buracdku halkaa oolli doonno waligii.

Subaxkasta, oo ay yimaadaan Hem iyo Haw xarunta burcadka C waxa ay galayeen jawi-deggen. Meeshana waxa ay u arkayeen sida iyada oo ay guriga hooyadood tahay. Waxa aynna meel-sudhanayeen kabaha oradka, iyaga oo markaa xidhanaya dacaska guriga lagu joogo. Waxa ay noqdeen kuwo farxadda iyo rayn-rayntu ka tanbadatay, maxaayeelay waxa ay heleen Burcad.

“Tani waa mid fiican,” ayuu Hem yidhi. “Halkan burcad nagu filan oo waligii naga dhammaanayn ayaa yaalla.” Binu’aadamkii yar-yar waxa ay dareemayeen farxad iyo in ay guulaysteen. Waxa ay u malanayeen in ay badbaadeen.

Ma ba dheerayn ba ka hor Hem iyo Haw waxa ay u talagalayeen burcadka ay ka helaan xarunta Burcad C sida wax ay iyagu leeyihiin.

Ugu dambayntiina, waxa ay kaydiyeen Burcad aad u wayn iyaga oo guryahoodina u raray meel u dhow xarunta Burcadka. Waxa aynna galeen nolol fiican.

Si ay u dareemaan farxad, gurigooda dhexdiisa Hem iyo Haw waxa ay ku sharaxeen gidaarka odhaahyo iyo sawirro, kuwaas oo ka dhigayo in ay dhoollacaddeeyan Marka ay akhriyaan:

In aad Burcad haysato ayaaba ah farxad tii ugu danbaysay.

Mararka qaarkood Hem iyo Haw saaxiibbadood ayay kaxaynsan jireen si ay u soo tusaan Burcadkooda rasaysan ee xarunta Burcadka C. waa aynna u tilmaami jireen iyaga oo u faanayo, waxa aynna ku dhihi jireen, "Burcad wanaagsan oo qurux leh" marka qaarkood waxa ay la wadaagi jireen saaxiibbadood; mararka qaarna lama wadaagijirin.

"Annagu waa aan u qalannaa burcadkan," Hem ayaa yidhi. "Annagu si dhab ah ayaan u shaqayn jirnay si aan u helno burcadka." waxa uu kor u qaaday gobol (fud) yar oo burcadka ka mid ah, ka dibna wuu cunay.

Waqtigaas ka dib Hem wuu seexday, waana caadadiisa ee ceebtiisa may ahayn.

Habeen kasta binu'aadmiga yar-yari waxa ay guriga ka soo buuxin jireen burcad; maalin kastana dib ayay u celin jireen.

Tani xaqiiqdii waxa ay qaadatay waqtigooda qayb ka mid ah.

Waqtigaas ka dib Hem iyo Haw kalsoonidoodu waxa ay isku baddashay islawayni. Isla markiiba waa ay xasileen ama waa ay nafiseen xataa ma aynnan dareemayn waxa dhacaya.

Isla markuu waqtigu tago Sniff iyo Scurry si joogta ah ayaa ay jidkooda u hayn jireen. Hore ayay u imaan jireen subax kasta, ka dibna waa ay ursani jireen, waa aynna xoqi jireen agagaarka xarunta burcadka C. iyaga oo baaraya in uu isbaddal ku yimid meesha iyo in kale, laga soo billaabo maalmihii hore maba aynna ka ag-kici jirin Burcadka, oo waa ay dulyuururi jireen si ay u laastaan.

Subax kamid ah subaxyada ayaa ay yimadeen xarunta Burcadka C waxa aynna arkeen in uunan Burcad oolin meesha.

Ma aynan la yaabin, maaddaama Sniff iyo Scurry ay ogaayeen in burcadku maalinkasta yaraanayay, waxa ay isku diyaariyeen isbaddalkan aan la baajin Karin waxa aynna barteen waxa ay samayn lahayeen.

Sidaa ay isu eegeen, waxay soo saarteen kabahoodii orodka, kuwaas oo qoorta u surteen. Waxa ay galiyeen kabahoodi cagaha xarrigii kabahana way isku adkeeyeen.

Jiirarku ma ay samayn baarid qoto dheer; mayna ku rarnay caqiiddooyin badan oo isku dhafan.

Dhinaca jiirarka, ficilka iyo ficilcelintu labadood way ufududayen xaaladda xarunta Burcadka C ayaa isbaddashay sidaas-awgeed Sniff iyo Scurry waxa ay go’aansadeen in ay isbaddalaan.

Isla maalintaas in yar ka dib, Hem iyo Haw waxa ay yimaadeen xarunta Burcadka C. iyaga oon wax taxadar ah siinaynin isbaddalka yar ee dhacaya maalin kasta, sidaas-darteed waxa ay u haysteen in burcadku meesha oolli waligiis.

Waxa ay ahaayeen kuwa isku diyaariya isbaddalka, sababta oo ah waxay helin burcad ay u maalanayeen inuun waligiis ka dhamaanaynin.

“Waa maxay! Burcad ma yaallo?” Hem ayaa ku dhawaaqay. Dhawaaqiisi ayuu sii watay, “burcad ma yaallo? Burcad ma yaallo?” wuxuu u malaynayay haddii uu kor u dhawaaqo inuu qof u soo celinayo.

“Yaa qaatay burcadkaygii ?” ayuu ku qaylay.

Ugu dambeyntii, wuxuu gacmahiisa saartay sintiisa, wajigiisuuna wuxuu isku baddalay casaan, cod dheer ayuu ku dhawaaqay,

“Tani caddaalad ma aha!”

Haw madaxiisa ayaa uu ruxay, isaga oon rumaysnayn waxa dhacay, sidoo kale waxa uu isku halaynayay inuu ka helo burcad xarunta Burcadka C, waqti badan ayuu halkaa taagnaa, wuuna isciilay, xaalad uuna isku diyaarinin ayaa qabsatay.

Hem ayaa wax ku dhawaaqayay, laakiin Haw muu rabin inuu maqlo dhawaaqa. Ma rabin inuu wax ka qabto wax soo wajahayo.

Binu'aadamka yar-yar dabeecaddoodu ma ahayn mid soo jiidasho leh ama wax-soosar leh laakiin waa la fahmi karay.

Helida burcadku ma ahayn mid dhib yar, in badan ayaa uga dhigantahay binu'aadamka yar-yar in ay haystaan burcad ay cunaan maalin kasta.

Helidda burcadka waxa ay binu'aadamka yar-yar uga dhignayd iyaga oo helay waddadii ay ku hormari lahaayeen, waxa aynna rabeen in ay faraxsanaadaan. Waxa ay fikir ka haystaan waxa uu yahay burcadka. Dhadhanka burcadka ee aan la'aantii wax la qaban karin.

Qaarkood in ay helaan burcad waxa ay uga dhignayd haysashada Dhar-xariir ah; halka qaarka kalana ay uga dhignayd ku raaxaysashada caafimaad wanaagsan ama kobcinta dareenka ruuxiga ah ee wanaagsan.

Haw burcadku waxa uu uga dhignaa dareemida nabad-galayo, helida qoys uu jacelyahay maalin uun. Iyo ku noolanshaha guri yar oo diiran oo ku agyaalla beerta.

Hem burcad waxa uu uga dhignaa, inuu noqdo Burcadku mid aad u wayn, ka dibna isagu dadka u maamulo iyo lahaanshaha guri aad u wayn oo ku yaalla buurta korkeeda.

Sababtoo ah, burcadka ayaa muhiim u ahaa iyaga, labada binu'aadam ee yar-yar waxa ay waqti dheer ku qaateen isku dayida in ay go'aan ka gaadhaan waxa ay samayn lahaayeen. Dhammaantood waxa kaliye ee ay ku fikirayeen waxaa weeye, hammigooduna uu ahaa waddadii ay ku heli lahaayeen burcadkii xarunta Burcadka C, si ay xaqiiqda uga sal gaadhaan bal in meesha Burcad yaallo iyo in kale.

Goortaa Sniff iyo Scurry si dhaqsa ah ayay u dhaqaaqeen, halka Hem iyo Haw si waadeen laba-labayntii.

Si kulul ayay u hadlayeen waxa aynna ku qafiifeen in ay tani dhammaan caddaaladdarro tahay, Haw waxaa ku dhacay niyad-jab. Maxaa dhici haddii burcadku oolli waayo barri? Waxa uu maskaxda ku qabsaday haddii uu barri oolli waayo inuu mustaqbalkiisu mugdi galayo.

Binu'aadmiga yar-yari sidan waxa ay u ahayd qaadanwaa. Sidee ayay u dhacday? Qofna u ma digin. Ma saxsanayn taas. Sidan ma ahan inay wax u dhacaan.

Hem iyo Haw waxa ay tageen gurigoodii habeenkaas gaajo iyo niyad-jab ayay ku seexdeen.

Laakiin ka hor intay tagin, Haw ayaa gidaarka ku qoray:

Hadba sida uu rabitaanka burcadku muhiim kuugu yahay, ayaa aad ilaashani oo aad noqoni mid ku mintida.

Maalintii ku xigtay Hem iyo Haw waxa ay ka tageen gurigoodii waxa aynna ku noqdeen xarunta Burcadka C mar kale, wali waxa ay rajaynayeen, si uun, inay u helan burcadkoodii.

Xaaladdu isma ay baddalin, burcadkiina wali halkii ma yaallo, binu'aadamka yar-yar may garanayn waxa ay sameeyaan. Hem iyo Haw halkaas ayay istaageen, may dhaqdhaqaaqayn sida taallo oyinka oo kale ayay qotomeen.

Haw indhiisa ayuu isku qabtay illaa intuu kari karay gacmihisa wuxuu dulsaaray dhagahiisa. Wuxuu rabay inuu waxkasta is dafarsiiyo. Muusan rabin inuu garto ilaha burcadku inuu si tartiib ah u yaraanayay. Balse waxa uu aaminsanaa in burcadka gabi la wada qaatay si kadis ah.

Hem wuxuu marar badan ku celceliyay baadhidda xaaladda, ugu dambayntiina, maskaxdiisa waxa ay ka badini wayday oo si caqiido ahaan ahna ay u dhaqangalisay, fahankiisuna ka badani

waayay “Sababta ay anniga iigu sameyeen tan?” isagu ayaa is wayddiiyay “Maxaa halkan ka dhacayo?”.

Ugu dambayntii Haw waxa uu kala qaaday indhihiisi, hareeraha ayuu eegay waxa uuna yiri: "Waar aawaye, kuwii xumxumaa ee Sniff iyo Scurry?” Maad u malaynaysaa iyagu inay ogyihiin waxa aan annagu garanayni?"

Hem waxa uu ku jees-jeesay “Talow maxay garanayaan iyagu?”

Hem hadalkii ayuu sii watay “Iyagu waa jiirar caadi ah kaliya, waxa ay ka falceliyaan waxa dhacay, annagu waxa aan nahay binu’aadmi yar-yar. Annagu waxaa aan nahay kuwa sooc ah. Annagu waxa aan awoodnaa in aan xallinno cilada, sidoo kale, annagu waxa aan u qalannaa wax fiican.”

“Tani in ay nagu dhacdo ma ahayn ama haddii ay dhacdayna, annagu ugu yaraan waa inaan ka helnaa qayb faa'iido ah.”

“Sababteen annagu faa’iido uga helaynaa?” Haw ayaa wayddiiyay.

“Sababtoo ah annagu xaq ayaan u leenahay,” Hem ayuu ku andacooday.

“Xaq maxa aan u leenahay?” Haw waxa uu rabay in uu ogaado.

“Annagu waxa aan xaq u leenahay burcadkeeni.”

“Sabab?” Haw ayaa wayddiiyay

“Sababtoo ah, annagu ma aannu sababin dhibaatadan,” Hem ayaa yidhi.

“Qof kala ayaa sameeyay tan markaas annaguna waa in aan wax uun ka helnaa.”

Haw waxa uu soo jeediyay “Annagu waa in aan joojinnaa baaritaanka badan ee aan ku samaynay xaaladda ka dibna waa in aan wax samaynaa si aan u helno burcad cusub.”

“Alla maya.” Hem ayuu ku qaylyay. “Anigu waxa aan isku dayay in aan ka sal gaadho arrintan”

Goortaas Hem iyo Haw wali waxa ay isku dayayeen in ay go’aansadaan waxa ay samayn lahayeen, Sniff iyo Scurry xilli hore ayay waddadoodi iska qaadeen. waxa aynna tageen xerada luuq-luuqa leh, kor iyo hoos ba, waxa ay raadinayeen burcad waxa aynna ka raadinayeen xarun kasta ay helaan.

Iyagu shay kale ka ma fikiraynin laakiin waxay ka fikirayeen oo kaliya helida burcad cusub.

Waxba may helin illaa in muddo ah ba, ugu dambayntiina waxa ay tageen meel ka mid ah xerada oo wali aysan arkin hadda ka hor: xarunta burcadka N.

Farxad ayaa la qaylyeen. waxa ay heleen waxa ay raadin jireen ilo burcad cusub oo aad u weyn.

indhahoodu ma ba rumaysan karin. waxa ay ahayd kaydkii ugu waynaa ee burcad ah ay jiirarku arkeen abid.

Isla waqtigaas, Hem iyo Haw waxa ay wali ku noqnoqanayeen xaruntii burcadka C iyaga oo qiimaynayay xaladooda. Iyagu hadda way dhibaatoonayeen taasi oo ka timid saamaynta ay ku reebtay haysasho la'aanta burcadka. Waxa ay noqdeen kuwa jahwareersan iyo kuwa caraysan, waxa ay isku eedaynayeen xalaadda ay ku jiraan.

Hadda Haw ayaa ka fekaray saaxiibbadiisi jiirarka ahaa, Sniff iyo Scurry, waxa uu rabay in uu ogaado in ay wali heleen burcad uun. waxa uu rumaysanaa in ay iyagu waqti adag ku jiraan inta ay ku jiraan orodka waxaa jira shaki ama walaac. laakiin waxaa kale oo uu garanayay ku dhawaad in ay muddo yar gudahood soo gabagaboobi.

Mararka-qaarkood, Haw waxa uu sawirranayay Sniff iyo Scurry in ay heleen Burcad cusub burcadkana ku raaxaysanayaan. Waxa uu u ka fikirayay sida ugu fiican ee ay ugu badheedhi lahaayeen xerada luuq-luuqa leh, ka dibna ay heli lahaayeen burcad cusub. Si uu burcad u dhadhamiyo.

'Inta badan si saafi ah Haw u arko sawirkiisa (malihiisa) helida iyo ku raaxaysashada burcadka cusub, waa inta badan isagu arko naftiisa inay ka tagayso xarunta Burcadka C.

“Aynnu tagno!” ayuu ku dhawaaqay, si kadis ah.

“Maya,” Hem ayaa si dhaqsa ah ku jawaabceliyay. “Halkan waan jaclahay, waa meel nolol-adag iyo dhibaato toona aan lahayn. waxa aan anigu ogahay sidoo kale meeshan meel ka baxsan waa meel khatar leh.

“Maya, ma aha,” Haw ay ku dooday “Annagu waxa aan soo marnay qaybo badan oo ka mid xerada luuq-luuqa leh hadda ka hor, haddana waan samayn karnaa marlabaad.”

“Anigu taas aad ayaan uga waynaaday,” Hem ayaa yidhi. “Anigu waa aan cabsanayaa ma xiisanayo in aan lumo, naftaydana doqon ka dhigo, adigu ma rabtaa?”

Cabsidiisi Haw ayaa dib ugu soo noqotay rajadiisi ahayd helida burcadka cusubna way yaraatay.

Sidaas-darteed, maalin kasta binu’aadmiga yar-yari waxa ay si wadeen in ay sameeyaan waxa ay hore u sameen jireen. Waxa ay tagi jireen xaruntii Burcadka C, waxa ay ugu tageen burcadkii oon meesha oolin ka dibna guryahooda ayaa ay ku noqon jireen, iyaga oo xanbaraasan walbahaar iyo jahwareer.

Iyagu waxa ay isku dayayeen in ay dafiraan waxa dhacayo, laakiin way ka seexan kari waayeen, maalin ba maalinta ku xigto awoodooda ayaa si yaraanaysay, waxa ay noqonayeen kuwo xanaaqsan .

Guryahooduna ma ahayn meel lagu kori karo sida ay mar ahaan jireen. Binu'aadmiga yar -yari seexashadu aad ayaa ay ugu adkayd waxa ay ku qarwi jireen helida burcad uun.

Laakiin Hem iyo haw wali waxa ay ku noqon jireen xarunta Burcadka C maalin kasta halkaas ayaa ay ku sugi jireen.

Hem ayaa yiri, “adigu waa aad ogtahay, haddii aan aad u shaqaynno waxa aan ogaan doonaa halkuu burcadku yaallo. Burcadku malaha wuu inoo dhawyahay, laga yaabaa in ay ku qariyeen burcadka darbiga gadaashiisa.”

Maalintii xigtay, Hem iyo Haw waxa ay xarunta ku soo noqdeen iyaga oo wata qalabka dhismaha. Hem waxa uu soo qaaday birjeeb halka Haw-na ku garaacay darbiga dube, ilaa ay ka sameeyeen duleel darbiga xarunta burcadka C. Waxa ay aad u fiiriyeen daloolka gudihiisa laakiin ka ma helin wax burcad ah.

Way niyad-jabeen laakiin waxa ay aaminsanayeen in ay xalin karaan dhibaatadan. Sidaas-darteed horrey ayaa ay shaqada u bilaaban, in badan way joogeen, aadna way u shaqayeen, laakiin

muddo ka dib, gabi ahaan waxa ay ku sameeyeen darbiga dalool weyn.

Haw waxa uu bilaabay in uu fahmo faraqa u dhexeeya waxqabashada iyo waxsoosarka.

“Laga yaabaa,” Hem ayaa yidhi, annagu waa inaan halkan fariisanaa ka dibna aragno waxa dhacaya, mar ay noqotaba waa in ay burcadka dib u soo celiyaan.

Haw waxa uu rumaystay arinkaas. Sidaas-awgeed maalin kasta waxa uu tagi jiray guriga si uu u nasto ka dibna waxa uu la soo noqon jiray Hem isaga oo caga jiidayo ilaa xarunta burcadka C. laakiin burcadkii wali may helin.

Ugu dambayntii, binu’aadmiga yar-yar gaajada iyo walwalku waxa ay ka dhigeen kuwa daciifin ah, Haw waxa uu ka daalay sugidda xaaladdu in ay isbaddasho. Waxa uu bilaabay in uu arko inta ay joogaan xarunta burcadka, waa xaaladdu inta badan ay ka siidarayso.

Haw waxa uu ogaaday in ay luminayeen awoodoodi.

Ugu dambayntii, maalin Haw naftiisa ayuu ku qoslay “Haw, haw, bal aniga I fiiri. Anigu waxa aan samaynayaa wax isku mid ah marar badan, aniga oo raba in aan ogaado sababta xaaladu u fiicnaan layihiin. Haddii ay tan ahayn caqli xumo, waxa ay noqoni maaweelo.”

Haw ma jeclayn fikradda dhex maridda xerada luuq-luuqa leh mar kale, sababtoo ah waxa uu ogaa in uu ku lumi, fikirna kama haysan meesha ka heli karo burcadka. Laakiin wuxuu ku qoslay nacasnimadiisa markii uu arkay waxa cabsidiisu ku samaynayso naftiisa.

Waxa uu Hem wayddiiyay, “halkee ayaan dhignay dharkii orodka iyo kabihii oroda?” waxa ay qaadatay waqti badan in ay helaan sababtoo ah wax kasta way iska fogeeyeen markii ay heleen burcadka xarunta Burcadka C, iyaga oo u malaynaya in aynan mar danbe u baahanyn.

Markuu Hem arkay saaxiibkii oo gashanaya dharkiisii orodka, ayuu ku yidhi, “Adigu xaqiiqdii maad tagaysaa xerada luuq-luuqa leh mar kale, adigu maad tagaysaa? sababtee aniga ila sugi wayday halkan ilaa ay ka soo celiyaan burcadka.”

“Sababtoo ah, adigu ma helaysid burcadka,” Haw ayaa yidhi. “Anigu ma rabo in aan arko laba midkood, laakiin hadda anigu waxa aan xaqiiqsaday inay waligood dib u soo celin doonin burcadkii hore, taasina ay ahayd burcadkii shalay. Waa waqtigii aan raadsan lahayn burcad cusub.”

Hem ayaa ku dooday, “laakiin ka warran haddii uusan burcad halkan meel ka baxsan uusan jirin?” Ama haddii uu jiro, maxaa aad samayni haddii aad heli waydo burcad.

“Ma ogi,” Haw ayaa yidhi. waxa uu naftiisa wayddiiyay su’aalo la mid ah kuwii hore ee uu marar badan iswayddiiyo, intaa ka dib waxa uu billaabay in uu dareemo cabsi , mar kale, taasi oo ku sababtay isagu inuu halkii uun joogo.

Dabadeed waxa uu ka fikirayay helidda burcad cusub iyo dhammaan shayada fiican sida burcadka, intaa kaddib waxa uu xoogga saaray dhiirrigalintiisii.

“Mararka-qaarkood,” Haw ayaa yidhi “Shayadu way isbaddalaan shayaduna waligood si iskumid ah ma ahaanayaan. Tanina waxa ay la mid tahay mid ka mid ah, waqtigaas, Hem. tani waa nolosha! noloshuna waa hayaan, annaguna sidoo kale.

Haw ayaa eegay saaxiibkiis oo macaluul la dhuubtay kaddibna waxa uu isku dayay in uu lahadlo si uu u dareensiiyo, laakiin Hem cabsidiisii waxa ay iskubaddashay cadho ma dhagaysanaynin hadalka saaxiibkiis.

Haw ka ma wadin inuu saaxiibkiis ku noqdo qof edab-daran, laakiin wuxuu ku qoslay sida doqonniimo leh labadooduba u dhaqmayaan.

Goortuu Haw isu diyaarinayay in uu baxo, waxa u billaabatay farxad iyo nolol cusub, isaga oo og taas ayuu ugu dambayn waxa uu awooday in uu naftiisa ku qoslo, Aan tagno Aan soconno. Waxa uu ku dhawaaqay, “Waa waqtigii xerada luuq-luuqa leh.”

Hem ma qoslin mana jawaabin.

Haw waxa uu qaaday dhagax-yar oo fiiqan kaddibna waxa uu darbiga ku qoray fikrado si uu Hem uga fikirro sidii caadadiisa ahayd. Haw xitaa waxa uu sawirray burcad, isaga oo rajaynaya in ay caawinayso; Hem si uu u dhoolla-caddeeyo, una farxo, una raadsado burcadka cusub, laakiin Hem ma doonaynin in uu arko qoraalka iyo sawirka. waxaa ku qornaa darbiga:



Dabadeedna, Haw madaxiisi ayuu kala soo baxay xarunta, si walaac leh ayuu u fiiriyay xerada luuq-luuqa leh. waxa uu ka fikirayay sida uu uga tagi lahaa xarunta aan burcadka lahayn.

Waxa uu aaminsanaa in uunan burcad oollin xerada luuq-luuqa leh ama isagu in uunan helaynin burcad.

Waxa uu jiif iyo joogba la qabanwaayay cabsidii oo ka tan badatay. Haw waa uu dhoolla-caddeeyay. Waxa uu ogaa Hem in uu is wayddiinnayo wali, "Yaa Qaatay Burcadkaaygii?" laakiin Haw waxa uu is wayddiinnayay, "Sababtaan anigu ugu kici laayahay burcadkan, una dabaraaci laayahay (u raad-guri laayahay) si dhaqso ah."

Markii uu sidaa uga baxay xerada luuq-luuqa leh, Haw dib ayuu u soo fiiriyay meesha uu ka yimid waxa uu dareemay istareex, Waxa uu dareemayaa in uu dib ugu noday dhul uu garanayo – in kastoo uunan helin burcad in muddo dhan.

Haw aad ayuu u walwalay waxa uunan iswayddiiyay haddii aad xaqiiqdii rabtid inaad ka baxdid xerada luuq-luuqa leh. Waxa uu darbiga ka soo horjooda ku qoray odhaah, ka dibna odhaahdii ayuu ku dhaygagay in muddo ah:

Haddii aadan cabsanaynin talow maxaa aad samayn lahayd adigu?

Isagu odhaahda ayuu ka fikirayay. Waxa uu ogaa mararka-qaarkood qayb cabsida ka mid ah in ay wanaagsanaan karto. Marka cabsanayso wax walba waxa ay noqonnayaan kuwo sii xumaada haddii aadan adigu waxba aadan samaynin, waxa kalay kugu dhalin kartaa adiga ficil. Laakiin ma fiicna marka aad adigu sidaas u cabsanayso in ay kuu diiddo in aad wax-uun aad samayso.

Waxa uu dhawray dhiniciisa midig, qayb ka mid ah xerada luuq-luuqa leh, halkaasuu waligii uusan arag, waxa uu dareemay cabsi.

Dabadeed, waxa uu xoog u qaatay neef (wuu neef-tuuray), waxa uuna u leexday dhinaca midig ee xerada luuq-luuqa leh, si tartiib ah ayaa uu u rucleeyay, ilaa uu ka gaadhay meel uunan garanaynin.

Waxa uu isku dayay in uu helo waddadiisii, Haw wuu murugooday, markii hore, isagu waqti badan ayaa uu ku sugayay burcadka xarunta Burcadka C. Ma helin burcad muddo dheer hadda wuu tabardareeyay, aad ayay uga xanuun badan tahay sidii caadiga ahayd ina la wada maro xerada luuq-luuqa leh. Waxa uu go'aansaday haddii helo fursad mar kale, inuu la qabsandoono sida degdegga ah ee la isku baddalo. Taasi oo wax kasta ka dhigta mid fudud.

Dabadeed, Haw wuu dhoolla-caddeeyay dhoolla-caddayn daciif ah, sida uu isagu u maleenayay, "Balse Si ka wanaagsan sidii hore."

Muddooyin dhowr maalmood ah oo isku xigxiga , Haw waxa uu ka helay burcad yar meelo kala duwan, Illaa in muddo ahna waa uu ku joogay oo kama ay dhammaan. waxa uu rajaynayay inuu helo burcad ku filan si uu qayb ugu qaado saaxiibkii Hem, si uu ugu dhiirrigaliyo sida uu uga soo bixi lahaa xarunta Burcadka C.

Laakiin Haw wali ma dareemin kalsooni buuxda. waa inuu qiraa, isagu inuu ku jahawareeray xerada luuq-luuqa leh. Wax kasta

waxa ay u muuqanayeen in ay isbaddaleen illaa waqtigii ugu dambaysay ee isagu ka soo baxay.

Marka u maleeyo inuu guul gaadhay waxa uu ka lumayay jidka. Waxa ay u muuqatay horumarkiisu inuu ahaa labo-tallaabo oo horrey ah iyo hal-tallaabo oo dib ah. Waxa ay ahayd loollan, laakiin waa inuu qiraa dib ugu noqoshada xerada luuq-luuqa leh, ugaadhsashada burcadku, in aynna u xumayn sida uu isagu ka cabsanayay in ay noqoto ama uu filanayay.

Sidaada uu waqtigu u dhaafo waxa uu iswayddiinayay haddii ay dhab ka tahay filashada helidda burcad cusub. Waxa uu iswayddiinayay haddii uu burcadka heli lahaa in uu halmar cantuugi lahaa. Dabadeed wuu qoslay, isaga oo xaqiiqsaday in uunan waxba haysan si uu calalsho haddeer.

Markasta oo uu niyad-jab ku dhacdo naftiisa waxa uu xasuusinayay waxa uu samayn jiray in ay ka istareexsanayn hadda, xaqiiqdii waa laga fiicanyahay joogidda xarun bilaa burcad ah. waxa uu door bidayay in uu naftiisa xakameeyo, halka uusan u oggalayn in ay wax isaga ku dhacaan.

Dabadeed, waxa uu naftiisa xasuusiyay, haddii Sniff iyo Scurry awoodeen in ay ka tagaan xarunta, isaguna inuu awoodo!

Goor-danbe, Haw ayaa waxa uu dib u milicsaday, oo uu xaqiiqsaday in burcadka yaallay xarunta burcadka C inuu hal

habeen ku qarsoomin, sida uu isagu u malayn jiray markii hore. Cadadka burcadka ee yaallay xarunta marba marka ka sii dambaysa way soo yaraanaysay, uga dambayntii waxa harayna waxa ay ahayeen ku duugoobay, ma lahayna dhadhan fiican.

Xitaa dhir yar yar oo cagaar ah ayaa ka dul baxday burcadkii hore, inkasta uu dareemin taas. Si kastaba waa inuu qirtaa, haddii uu doonayay, laga yaaba in uu awooddi lahaa in uu arko waxa ku soo food leh. Laakiin isagu ma rabin.

Hadda Haw waxa uu xaqiiqsaday, laga yaabaa isbaddalku in uusan ku noqon lahayn la yaab haddii u la socon lahaa waxa dhacayay, haddii uu isku diyaarin lahaa ama ka fikiri lahaa isbaddalka. Waxaa suurta gal ah tan in ay ahayd wax Sniff iyo Scurry ay samayn jireen. Wuu yar istaagay si uu u nasto ka dibna waxa uu darbiga xerada luuq-luuqa leh ku qoray:

Had iyo jeer burcadka wanaagsan waxa aad ku garani urta, halkaana waxa aad ku ogaan kan duugoobay.

Muddo ka dib, waqti dheer ayaa ay ula muuqatay inta uunan helin burcadka, ugu dambayntii Haw waxa uu helay xarun burcad oo aad u weyn taasi oo u muuqatay rajo fiican. Marka uu isagu

gudaha ugalay, Hase-yeeshee, aad ayuu u niyad-jabay marka uu ogaaday in xarunta burcadku ay madhantahay.

"Dareenkan madhan ayaa aniga igu dhacay inta badan," ayaa ku fikiray. Waxa uu dareemay sida ruux is dhiibay dareemi lahaa.

Haw waxaa yaraanaayay awoodda jidhkiisa. Waxa uu qirtay in uu lunsan yahay, waxaa kale oo uu ka cabsiqabay in uunan sii noolanaynin. Waxa uu ku fikiray inuu dib u laabto illaa xaruntii burcadka C. ugu yaraan, haddii uu dib u noqdo, Hem-na wali halkii ayuu joogaa, Haw kali ma ahaadeen. Dabadeedna waxa uu naftiisa wayddiiyay su'aashii hore mar kale: "Maxaa aad samayn lahayd haddii aadan cabsanaynin?"

Isagu badanaa aad ayaa uu u cabsanayay aad ayuuna u jeclaa inuu qirto, xitaa naftiisa, had iyo jeer ma hubin waxa uu isagu ka cabsanayo, laakiin xaaladdiisa oo tabardaraysay, hadda waxa uu ogyahay, inuu si dhibyar u cabsanayo in uu kali socdo. Laakiin Haw muunan garanaynin taas, isaga waa uu daba-cararayay sababtoo ah isaga waxaa culays ku hayay aaminsanaanta cabsida leh.

Haw waxa uu iswayddiinayay haddii uu Hem ka soo tagay ama haddii isaga wali cabsidiisu curyaamisay, dabadeed, Haw waxa uu soo xasuustay waqtiyadii markuu wanaagsanaa ee xerada luuq-luuqa leh dhexdeeda, waa markuu la socday saaxiibkiis Hem.

Waxa uu darbiga ku qoray, waxa uu ogaa in ay tani inbadan naftiisa xasuusinayso sidaadu ugu calaamadeeyo saaxiibkiis Hem isaga oo rajaynaya in uu calaamaddan soo raaco:



Haw waxa uu hoos u fiiriyay surinka waxa uuna yaqiinsanaa cabsidiisa. Maxaa kaa dhigaya horseed? Ma faaruq baa? Aaway meelihii halista lahaa? Waxa uu sawirtay dhammaan nooc kasta oo cabsi ah taasi ku dhici karta. waxa uu naftiisa uga baqayay dhimasho.

Dabadeed naftiisa ayuu ku qoslay. waxa uu xaqiiqsaday cabsidiisu in ay ka dhigaysay waxkasta in ay sii xumaadaan. Sidaas-darteed, waxa uu sameeyay wax isagu samayn lahaa haddii uunan cabsanaynin. waxa uu u dhaqaaqay jiho cusub.

Sidaadu u bilaabay in uu ku dhex socdo surinada madow waa uu muusooday. Haw wali ma xaqiiqsan, laakiin waxa uu raadinayay wax uu naftiisa ku quudiyo. Waxa uu naftiisa u oggolaanayay in ay tagto isaga oo ku kalsoon wax isaga horseed ka dhigaya. In kasta oo isagu dhab aahaantii garanaynin.

La yaabkiisa, Haw wuxuu dareemay raaxo farabadan.

“Sababtee anigu u dareemayaa wanaag” ayuu iswayddiiyay “anigu ma haysto burcad, aniguna ma ba garanayo halkaan tagayo.”

Isla markiiba, waxa uu ogaaday sababta u dareemayo wanaagga.

Wuu istaagay waxa uuna darbiga mar kale ku qoray:

Marka aad cabsida iskadaysid

waxa aad dareemi wanaag!

Haw waxa uu xaqiiqsaday in cabsida badan ay maxbuus ka dhigtay . U dhaqaaqidda jiho cusubna in ay xor ka dhigtay. Hadda waxa uu dareemay neecawda qabaw ee ka dhacaysa qayb ka mid ah xerada luuq-luuqa leh, waxa ay ahayd laydhsi. Waxa uu qaatay neef kaddibna waxa uu ka dareemay awoodda dhaqaaqista. Mar Alliyo marka uu soo xasuusto cabsidiisi hore, waxa uu u baddali jiray raaxo taasi oo dhaanta sida uu markii hore aaminsanaa.

Haw ma marin waddadan waqti dheer. Isagu ku dhawaad wuu iloobay in ay madaddaalo ahayd ku socodkeedu.

Si uu uga dhigo shayga mid wanaagsan xitaa Haw wuxuu bilaabay inuu maskaxdiisa ku sawiro sawirro mar kale.

Haw waxa uu naftiisa ku arkayay isaga oo ku dhex jira qayb burcad ah oo weyn, oo dhex fadhiyana rasooyin dhammaan burcadka uu jeclaa ah. Iaga soo billaabo burcadka adag illaa burcadka jilicsan.

Haw waxa uu arkayay naftiisa oo cunaysa burcad badan oo uu jeclaa, wuu ku raaxaysanayay waxa uu isagu sawiranayo. Dabadeed waxa uu sawirtay intee in le'eg buu isagu ku raaxaysan lahaa dhammaan dhadhankooda wanaagsan. Waxaa la tusay (la horkeenay)

Inta badan si saafi ah u arko sawirka naftiisa oo ku raaxaysanaysa burcadka cusub, waa inta badan ay noqonayso dhab iyo inuu rumaysto, waxa uu dareemayay inuu u socdo si uu u helo burcad. Isagu waxa uu darbiga ku qoray:

Sawirashada naftaada oo ku raaxaysanaysa burcad cusub, Waxa ay kuu hoggaamin kartaa madasha dhabta ah ee uu yaallo burcadka.

Haw waxa uu ka fikirayay in uu awooddo inuu helo halkuu ka fikiri lahaa waxaa isagu ka khasaarayo.

Waxa uu iswayddiiyay sababta had iyo jeer isagu u malaysanayo in isbaddalku ku sababay wax aad u xun. Hadda waxa uu xaqiiqsaday inuu isbaddalku ku sababi karo wax aad u fiican.

“Sababtee anigu u arki waayay tan mar hore?” naftiisa ayuu wayddiiyay.

Dabadeed waxa uu dhex orday xerada luuq-luuqa leh si xoog iyo awood leh. Isla markiiba waxa uu istaagay xarun burcad, aad ayaa uu u farxay marka uu sidaa u arkay gabalo yar-yar oo burcad cusub meel u dhaw albaabka xarunta burcadka yaallo.

Waxa ay ahaayeen nooc ka mid ah burcadka uusan arkin hadda ka hor. Laakiin waxa ay u muuqdeen kuwo fiican. Wuu iska tijaabiyay kaddib waxa uu ogaaday in ay dhadhan fiican leyihiin. Burcadkii cusbaa intiisa badan waa uu cunay; halka qayb yarna uu jeebkiisa ku ritay si uu hadhow u cuno ama lagayaabaa inuu saaxiibkii Hem u la wadaago. jidhkiisu waxa uu bilaabay dib u soo kabasho, xooggiisi.

Waxa uu galay xarunta burcadka isaga oo aad u faraxsan. Laakiin, qarracankiise, waxa uu ogaaday inay faaruq tahay meeshu, Qof baa halkan joogay ka dibna ka reebay gabolada yar yar ee burcadka cusub kaliya.

Waxa uu xaqiiqsaday haddii uu xilli hore imaan lahaa, waxaa lagayaabi lahaa inuu halkan ka heli lahaa burcad fiican.

Haw waxa uu go'aansaday inuu dib u noqdo ka dibna uu arko haddii uu Hem diyaar u yahay inuu soo raaco.

Sidaadu isagu dib tallaabadiisa u qaadayba, waa uu istaagay waxa uuna darbiga ku qoray:

Sida degdega adigu faraha uga qaadid burcadkii hore.

Waa Sida dhakhsa badan adigu u heli burcad cusub.

Muddo kaddib Haw waxa uu dib ugu noqday xarunta burcad C wuxuuna ugu tagay Hem. wuxuu Hem siiyay jab-yar oo burcad cusub ah, laakiin Hem wuu ku gacan saydhay.

Hem waxa uu mahadiyay baaqa saaxiibkiis waxa uuna ku yidhi: "Anigu uma malaynnayo inaan jeclaan burcad cusub, Tan ma aha anigu waxa aan samayn jiray, anigu waxa aan doonayaa in burcadkaygii dib-laygu soo celiyo, anigu ma doonayo inaan isbaddalo illaa anigu helo waxa aan rabo."

Haw madixiisa ayuu luxay isaga oo cago-jiidaya oo ka niyad - jabsan, waddadiisii ayuu dib ugu noqday. Sidaadu uu dib ugu

laabtay meeshii ugu fogayd oo isagu gaadho xerada luuq-luuqa leh dhexdeeda. Waxa uu waayay saaxiibkiis, laakiin waxa uu xaqiiqsaday in uu jecelyahay waxa isagu daahfurayo, xitaa inta uunan helin ka hor waxa isagu rajaynayo, taas oo ah burcad cusub oo weyn. Xitaa haddii, isagu ogaado waxa ay ka dhigan tahay in uunan ku farxaynin oo kaliya ah haysashada uu burcad haysto.

Aad ayuu u faraxsanaa, maxaa yeelay, cabsidiisu ma ay maamulaynin. Waxa uu jeclaa waxa uu immika samaynayo. Haw-na waxba kama ogayn, maxaa yeelay, waxa uu dareemayay tabar-darri.

Siduu isagu dareemayay markuu joogay xarunta burcadka C taasi oon lahayn burcad. Hadda wuxuu xaqiiqsaday isagu in uunan u oggolaanaynin cabsidiisu inay isaga joojiso, ogaanshaha taas, wuxuu qaaday jiho-cusub, taas oo quudinayso siinaysana awood.

Hadda waxa uu dareemay taasi in ay ahayd su'aal waqtigaas ah, ka hor intuusan helin waxa uu doonayay dhab ahaantii, Inuu helay wax walba oo uu horrey u raadin jiray.

Markii uu xaqiiqsadayna waa uu dhooll-acadeeyay:

Wax dhib ah maleh inaad ka dhex raadiso burcad xero luuq-luuq leh, inta aad joogi lahayd xarun billaa burcad ah.

Haw mar kale ayuu xaqiiqsaday, waxa uu ka cabsanaysay marnaba uma xuma sida aad u sawirranaysay. Cabsida maskaxdiisa ku sawirnay ayaa ka xun xaaladda dhab ahaan ee jirta.

Aad ayuu uga cabsi-qabay in aanu marnaba helayn burcad cusub, sidoo kalena ma dooneynin inuu bilaabo raadinta burcadka

Laakiin ilamaa intuu soo bilaabay socdaalkiisi, wuxuu waddada ka helay burcad ku filan si uu u sii socdo, hadda isagu xagga hore ayuu fiiriyay si uu uhelo burcad dheeraad ah. Kaliya fiirinta xagga hore ayaa ba ahayd mid farxad leh.

Hab fikirkiisi hore waxaa hadheeyay cabsidiisi iyo walbahaarkiisi. wuxuu ka fikiri jiray inuu haysanaynin burcad ku filan ama inuu haysanaynin illa maa intuu rabo. Wuxuu ka fikir jiray in badan waxa ka xumaan kara halkuu ka fikiri lahaa waxa u hagaagi kara.

Laakiin wuxuu isbaddalay maalmihii uu ka tagay xarunta burcadka C.

Waxa uu aaminsanaan jiray inaan burcadka marnaba la qaadayn waxaa kale oo uu aamminsanaa inuusan xaq ahayn isbaddalka ku dhacay.

Hadda waxa uu fahmay isbaddalku inuu si dabiici ah, oo joogta ah inuu u dhacayo, hadii aad adigu filanaysid iyo haddii aadan filanaynin ba.

Isbaddalku waxa uu adiga kaa yaabin kaliya haddii aad adigu filanynin isbaddalka.

Marka uu fahmay waxa uu baddalay waxa uu aaminsanaa, wuu yar istaagay si uu ugu qora darbiga:



Haw wali muuna helin burcad, laakiin isaga oo sidaa u dhex socdo xerada luuq-luuqa leh, ayaa waxa uu ka fikirayay waxa uu hadda ka hor u bartay.

Haw hadda waxa uu xaqiiqsaday in hab fikirkiisa cusub ku dhiirrigalinayo hab dhaqan cusub. Wuxuu u dhaqmaayay si ka duwan markuu u dib ugu laabanayay xarunta aan burcadka lahayn.

Wuxuu ogaaday marka adigu baddashid waxa aad aaminsantahay, adigu waxa aad baddali waxa aad adigu samayso. Ama waxa aad aamini isbaddalku inuu wax ku yeelayo kaddibna adigu waad iska

caabbin isbaddalka. waxa aad aamini kartaa helidda burcad cusub in ay adiga ku caawini kaddibna waxa aad oggolaani isbaddalka.

Dhammaan waxa ay ku xirantahay waxa aad adigu doorato inaad aaminto.

Waxa uu darbiga ku qoray:

Markaad adigu aragtid inaad adigu heli kartid kuna raaxaysan kartid burcad cusub, Adigu waxaad badashaa jihada.

Haw waxa uu ogaaday, in uu haddaa muqaalkiisu fiicnaan lahaa haddii uu isbaddalka ka felcelin lahaa si deg deg ah, mar horena ka tagi lahaa xarunta burcadka C. Waxa uu dareemi lahaa awood jidheed iyo mid ruuxeed labadaba---kaddibna waxa uu awoodi lahaa in uu si fiican u maareeyo loollanka helidda burcadka cusub. Dhab ahaantii, malaha isagu hadda wuu heli lahaa burcadka haddii isagu filan lahaa isbaddalka, inta uu waqtiga ku luminayay dafiridda isbaddalka ayuu waqtigii ka hor dhacay.

Waxa uu isticmaalayay malo-awaalkiisi ka dibna waxa uu arkay naftiisi oo helaysa burcad cusub oo aad u carfoon. waxa uu go’aansaday in uu u sii anbaqaado meel uusan garanaynin oo ka mid ah xerada luuq-luuqa leh, waxa uu ka helay jabab yar-yar oo

burcad ah meelo kala duwan, Sidoo kale Haw waxa uu bilaabay in uu dib u soo kabmo xooggiisi iyo kalsoonidiisiba.

Mar waxa uu ku fikiray in uu dib ugu noqdo meeshii uu ka yimid. Haw wuu farxayay, isagu qoraal buu ku qoray darbiyada meelo badan, waxa uuna aaminsanaa qoraalada iyo sawirradu in ay saaxiibkii Hem tilmaan u noqonnayaan si uu u sooraaco, haddii doorto in uu ka tago xarunta burcadka C.

Haw waxa uu rajaynayay in uu abbaarayo jahada saxsan. Waxaa kalo oo uu ka fikirayay suurto-galnimada in uu Hem akhristo qoraal-gacmeedka darbiga ku qoran, ka dibna Hem uu waddada helo.

Waxa ay ka fikirayay in muddo ah, deedna darbiga ayu ku qoray:

Isbaddalka yar oo aad fiiragaar ah u yeelato waxa uu kaa caawinayaa: in aad la qabsato isbaddalka wayn kaas oo u dhici kara.

Hadda, Haw waa uu iska illaaway wixii tagay waxa uunan la qabsanayay mustaqbalka.

Waxa uu sii watay orodkii xerada luuq-luuqa leh dhexdeeda si xoog iyo xawaare leh. Si dhaqso leh, waxay ula muuqatay in uu

waligiis joogi jiray xerada luuq-luuqa leh, socdaalkiisina ama ugu yaraan qayb ka mid ah socdaalkiisi – si farxad leh iyo si degdeg leh u soo dhammaaday.

Haw waxa uu u sii socday surrin taasi oo isaga ku cusbayd, meel dhaw, ayaa uu kehelay burcadka cusub ee xarunta burcadka N

Markuu dhex galay, waxa uu ka naxay waxa uu arkay rasooyin burcad ah oo dhaadheer ayaa meel waliba yaallay tani waxay ahayd illo burcad ah uu san waligiis arag. muusan wada garanaynin dhammaan waxa uu arkay, madaamoy qayb burcadka ka mid ah ayaa isaga ku cusbayeen.

Dabadeed mudo yar ayuu is waydiiyay inay dhabtahay ama ay malahiisa tahay, illaa maa isagu arkay saaxiibadiisi hore Sniff iyo Scurry.

Sniff wuxuu ku soo dhaweeyay Haw madixiisa ayuu u lulay halka Scurry uu gacan haadiyay. Calooshooda yare e buuran ayaa isaga tusaysay inay halka muddo ay joogeen.

Haw si deg deg ah ayuu u salaamay saaxiibaddiis isla markii waxa uu dhan dhamiyay gobalo yar-yar oo kala duwan ee isagu jaclaa, kabihiisa orodka iyo dharkiisa ayuu iska saaray wuxuuna dhigtay meel u dhaw lacalaa haddii uu baahdo mar kale. Dabadeed wuxuu ku dhex booday burcadkii. Markuu cunay caashiisana buuxsaday, wuxuu kor u qaaday gobol(fud) yar

burcad cusub ah wuxuuna yidhi “Isbaddalka dartii, farxad han u cuno.”

Markuu Haw burcadka cunayay, wuxuu dib u milicsaday wuxuu isagu bartay.

Wuxuu xaqiiqsaday markuu isbaddalka ka cabsani jiray, waxaa u diidan isbaddalka inay ahay mala’awaalka burcadkii hore.

Sidaas-darteed maxaa ku sababay inuu isbaddalo? Ma ka cabsashada macaluul inuu u dhinto? Haw wuu dhoolla-cadeeyay, waa siduu isagu u malaynayay xaqiiqdi.

Dabadeed wuu qoslay wuxuuna xaqiiqsaday, inuu bilaabay inuu isbaddalo goortuu isagu bartay inuu naftiisa ku qoslo iyo wuxuu samayn jiray oo khaldanaa. Wuxuu fahmay wadada ugu dhakhsaha badan ee la is ku baddalo waa in aad ku qososhid nacasnimadaada. --- dabadeedna adigu faraha ka qaadi kaddiban si dhaqso leh tallaabo hore ugu qaadid.

Wuxuu ogaaday inuu wax faa’iido u leh ka bartay saaxiibadiisa jiirarka ah, Sniff iyo Scurry. Iyagu nolosha waxa ay ka dhigeen mid fudud. Si qoto dheer leh uma baaraynin ama wax iskuma adkaynaynin. Marka xaaladu isbaddashay burcadkana ay waayeen, way isbadaleen burcadkana way la socdeen. Isagu tan waa inuu xasuustaa.

Dabadeed, Haw waxaa kaloo uu isticmaalaya maskaxdiisa cajiibka ah si uu u sameeyay wax ka fiican waxa jiirarku samaynayaan.

Waxa uu maskaxdiisa ku sawiranay naftiisa- si dhab- isagoo helaya wax fiican – ama wax ka siifican.

Waxa uu ka falceliyay khaladkii u isagu hore u sameeyay wuxuuna u isticmaalay si qorshaysto mustaqbalkiisa . Wuxuu ogaaday in aad baran karto sida loo maareeyo isbaddalka.

Waxa aad noqon kartaa mid og baahid si looga dhigo shay wax fudud, noqo qof dabacsan, dhakhso u dhaqaaq.

Uma baahnid in aad wax isku adkayso ama naftaada ku wareerisid caqiido cabsi leh.

Waxa aad awooda in aad garato marka isbaddalka yari bilaawdo sidaas-darteed waxa aad si fiican iskugu diyaarini isbaddalka weyn kaasi oo imaan doona mar aya noqotaba.

Wuxuu ogaaday isagu inuu u baahnaa inuu dhakhso ah la qabsado, haddii aad la qabsan waydo wakhtigaas, adigu waligaa lama qabsandoontid.

Waa inuu qiraa wax ugu weyn ee hortaagan isbaddalka inuu naftaada ku dhex jiro, waxna ma fiicnaanayaan ilaa maa aad baddashid.

Laga yaaba ta ugu muhiibsan, isagu xaqiiqsado had iyo jeer waxaa jiro burcad cusub dibada haddaa garanayso ama haddii kale ba. Taasi oo abaal marin u helayso markaad ka baxdo cabsidadi hore, ku raaxayso faa'iidadaad.

Waxa uu ogaa qayb ka mid ah cabsida waa inaa la tixgaliyo, maxaa yeelay waxay kaa badbaadin kartaa halista, laakiin waxa uu fahmay dhamaan cabsidiisu inay ahayd mala'awaal taasi oo u diidaneed isagu inuu isbaddalo markuu u baahnaa isbaddalka.

Isagu wakhtigii hore ma jacleen isbaddalka, laakiin wuxuu garanayay inuu isbaddalku u hoggaamin karo inuu helo burcad cusub.

Marka uu Haw dib u soo xasuusto wax uu bartay, wuxuu ka fikiraa saaxiibbkiisi Hem. Wuxuu is waydiinayay haddii uu Hem akhristay odhaahyadii Haw darbiga xarunta burcadka C iyo xerad luuq-luuq ah ku qoray.

Hem wali ma uu go'aansaday inuu xarunta burcadka C ka soo baxo ama inuu isbaddal sameeyo? Hem wali ma uu soo galay xerada luuq-luuq leh kaddibna ma uu baadigoobay wax noloshiisa ka dhigi lahaa mid wanaagsan?

Hem wali ma halkii bu ku sugan yahay sababtoo ah isagu isma baddalin?

Haw wuxuu ka fikiray inuu marlabaad dib ugu noqdo xarunta burcadka C is uu u arko haddii uu isagu helo Hem – isagoo ka soo qaadayo inuu wadadiisa helidoono haddii uu helo Hem, wuxuu u maleenayay inuu awoodi karo inuu tuso sida looga baxo xaalada adag. Laakiin wuxuu ogaa inuu mar hore isku dayay siduu saaxiibkiis isku baddalilahaa.

Hem waa inuu helaa wadadiisa, taasi oo ka baxsan cabsidiisa hore iyo raaxadiisa. Qofna uma sameenayo tan ama kala ma hadlayo. Isagu waa inuu arkaa faa'iidada leedahay isbaddalka naftiisa

Haw waxa uu ogaa inuu saaxiibkiis u reebay calaamado taasi tusi karta inuu helo wadada, haddii uu isagu akhriyo qoraal gacmeedka darbiga.

Haw waxa uu ku qoray darbiga xarunta burcadka N dhammaan qoraaladii oo kooban, taasi u bartay. Waxa uu sawiray gobol aad u weyn oo burcad ah. Qosol ayuu dareemaa markuu eegay waxaa uu isagu bartay.

QORAAL-GACMEEDKA DARBIGA

Isbaddalku Wuu Dhacayaa

Burcadkay Qaadayaan

FIllo Isbaddalka

Isku diyaari in burcadka la qaadi

Muraaqabee Isaddalka

Had iyo jeer burcadka wanaagsan waxa aad ku garani urta, halkaana waxa aad ku ogaan kan duugoobay.

La Qabso Isbaddalka Cusub

Sida degdega adigu faraha uga qaadid burcadkii hore. Waa Sida dhakhsa badan adigu u heli burcad cusub.

Isbaddal

la soco burcadka

Ku Raaxayso Isbaddalka!

Ku raaxayso dhadhanka burcadka cusub!

Diyaar u Ahaw Inaad Si Dhakhso Leh Isku baddashid Kuna Raaxayso.

Burcadkay Qaadayaan

Haw wuxuu xaqiiqsaday in ay muddo dhan ka soo wareegtay markuu Hem la joogay xarunta burcad C, laakiin wuxuu ogyahay inuu si dhib yar dib taraarixi karo haddii aad u istireexo. Maalin kasta wuu indho indhaynayay xarunta burcadka N is uu u arko xaalka burcadka ee xarunta burcadka N, wuxuu samaynayay wax allaale wuxuu uga badbaadi lahaa yaabka isbaddalka kadiska.

Inkastoo Haw wali haysto illo burcad oo ku filan, wuxuu u bixi jiray xerada luuq-luuq leh si uu u sahmiyo meelaha u dhaw ugana war hayo wax ka dhacayo hareerihiisa. Isagu wuxuu ogyahay inay aad u fiicantahay inaad ka war haysid hareerahaaga intaad meel uun joogi lahayd.

Dabadeed, Haw wuxuu maqlay wax uu u maleeyay shanqadh socod, markay shanqadhu badatay, waxaa u xaqiiqsaday inuu qof soosocdo.

Ma Hem ayaa soosocdo? Ma gooladda ayuu ka soo leexanayaa?

Haw wuxuu yidhi duco yar iyo rajo, ugu dambaytii saaxiibkiis wuu awoodday.

la soco burcadka

kuna raaxayso burcadka!

WADA SHEEKAYSI: ISLA MAALINTII

Markii uu Micheal dhammeeyay sheekada, wuxuu fiiriyay qolkii wuxuuna arkay saaxiibbadiisi hore isku fasalka ahaayeen oo u dhoolla-caddaynaya.

Dhowr qof ayaa u mahadnaqay waxa ayna ku yidhaahdeen waxa aan ka helnay wax badan oo faa'iido leh sheekada dhexdeeda.

Nathan ayaa wayddiiyay kooxda, "Maxay idin latahay haddii aan kulanno xilli kale, waxaa laga yaabaa in aan ka wada hadalno sheekada."

Dhammaantood waxa ay yidhaahdeen waan jacelnahay in aan ka wada hadallo sheekadan, sidaas-awgeed waxa ay diyaarsadeen kulan cabbitaan ah ka hor cashada.

Fiidkaas, sidaaday barxadda cawayska ugu kulmeen, waxa ay billaabeen in ay ku kaftamaan sidii ay raadinayaan burcadkoodii waxa ayna naftood ku dhex arkayeen xerada luuq-luuq leh.

Dabadeed, Angela ayaa si dabeecad-wanaagsan kooxdii wayddiisay, "Adigu kumaad ahayd sheekada dhexdeeda? Sniff, Scurry, Hem ama Haw?"

Carlos ayaa ugu jawaabay, "Hagaag, anigu tan ayaa galabtadan ka fikirayay. Si fiican ayaa u xasuustaa wakhti hore waxaa lahaa

xarun ganacsi oo iibisa alaabaha ciyaaraha, marka anigu la kulmo isbaddal.

“Anigu ma ahayn Sniff – anigu maan baaraynin xaaladda sida oo kale maanan arkaynin isbaddalka xilli hore. Anigu hubaal maan ahayn Scurry – anigu isla markaba ficil ma samaynayn.

Waxa aan ahaa sida Hem oo kale, kaasi oo raabay inuu joogo meesha uu yaqaanay. Dhabtii, ma rabin in aan maareeyo isbaddalka. Xitaa maan doonayn in aan arko isbaddalka.

Micheal, kaasi dareemayay sida inuu wakhtiba ka soo wareegin tan iyo markii isaga iyo Carlos ay saaxiib dhaw ahayeen dugsiga dhexdiisa, ayaa wayddiiyay, “Maxaan annagu ka hadlaynaa, Jaalle?”

Carlos ayaa yidhi, “Isbaddalka aan la filanayn ee shaqooyinka.”

Micheal ayaa qoslay. “Adiga shaqadii ayaa lagaa cayriyay?”

“Hagaag, kaliya aan dhahno anigu ma rabin in aan baxo si aan u raadsado burcad cusub. Waxa aan u malaaynayay inaan haysto sabab wanaagsan, sababta uu aniga isbaddalku iigu dhacayn. Sidaas-darteed, anigu si weyn ayaa u xanaaqayay wakhtigaas.”

Qayb ka mid saaxiibadoodi hore ay isku fasalka u ahaayeen kuwaas aamuusnaa billawgii ayaa hadda dareemay nafis waayna

hadleen, waxaa ka mid ahaa Frank, kaasi ku biiray ciidanka xoogga dalka.

“Hem waxa uu isoo xasuusiyay mid ka mid ah saaxiibbaday,” Frank ayaa yidhi. “Waaxdiisa ayaa albaabad la iskugu dhufanaayay, laakiin muusan rabin inuu arko tan. Iyagu Shaqalihiisa ayaay meeleynayeen.

Annagu dhammaan waxa aan isku daynay in aan la hadalno isaga fursadaha badan ee kale kaasi ka jira shirkadda dhexdeed taasi loogu talagalay qofkii raba inuu noqdo mid dabacsan, laakiin uma malaynay isagu waxaa ku waajib ah inuu isbaddalo. Waxa uu ahaa qofka kaliyee la yaabay markii waaxdiisa la xidhay. Hadda wakhti adag ayuu ku suganyahay si uu la qabsado isbaddalka uu san u malaynanayn inuu dhacayo.

Jessica ayaa tidhi, “Anigu uma malaynayo tani inay aniga igu dhacday sidoo kale, laakiin burcadkaayga mar wax ka badan ayaa la qaaday, khaasatan noloshayda shakhsi ahaaneed, laakiin dib ayaan qisadayda idin kala wadaagi.”

Dhammaan kooxdii way qosleen, marka laga reebo Nathan.

“Waxaa laga yaaba tani waa dulucda,” Nathan ayaa yidhi.

“Isbadalku dhamaanteen wuu innagu wada dhacaa.”

Waxa uu ku sii daray, “waxa aan filayaan qoyskayagu inay maqleen sheekada burcadka hadda ka hor. Nasiib-darro annagu ma rabin in aan aragno isbaddal inuu ku imaanayo ganacsigeena, hadda xeedho iyo fandhaal ayaa kala dhacay – waxa aan xidhaynaa ugu badnaa bakhaaradeeni.”

Taasi waxa ay ka yaabisay dad badan oo kooxid ah, sababtoo ah waxa ay u malaynayeen Nathan inuu ahaa mid nasiib fiican leh xagga ganacsiga u ku tiirsanyahay, sannadba sannadka ku xiga.

“Maxaa dhacay?” Jessica ayaa rabtay inay ogaato.

Bakhaarkeeni yar si lama fillaan ah ayuu u noqday faashiin hore markay bakhaaro aad u weyn yimaadeen magaalada kuwaaso lahaa alaabo badan qiimo yarna ku iibinayay. Annagu waan la tartami kari waynay.

“Anigu hadda waxa aan fahmay halka aan ahayn lahayn sida Sniff iyo Scurry, annagu waxa aan ahayn sida Hem oo kale. waxa joognay halkaa markii hore joognay isma aanan baddalin. Waxa aan isku dayaynay in aan iska indho-tirno waxa dhacayay hadda annagu waxa aan ku dhexjirnaa dhib. Annagu waa inaan ka qaadano laba cashir Haw – sababta oo ah annagu hubaal nafteena kuma qosli Karin sidoo kale mana baddali karni waxa annagu samaynayno.”

Laura, taasi oo noqotay gabadh ganacsi ku guulaysatay, ayaa dhagaysanaysay, laakiin illaa iyo hadda juuq aan dhihin. “Anigu sidoo kale waxa aan ka fikirayay sheekadan galabtay,” ayaa tidhi

“Waxa aan iswayddiinayay sida anigu u noqo lahaa sida Haw oo kale in aan u arko waxa aan anigu samaynayo khalad, naftaydana aan ku qoslo, isbaddalana si aan wax ka wanaagsan u sameeyo.”

Waxa ay tidhi, “Wax waliba waan ogahay. Imis qof oo halkan joogta ayaa ka cabsato isbaddalka?”

Hal qof kama jawaabin sidaas-darteed waxa ay soo-jeedisay “Bal gacmaha taaga?”

Hal gacan oo kaliya ayaa kor lootagay. “Hagaag, tani waxa ay u muuqataa inuu innagu jiro hal qof oo daacad ah kooxdeena!” ayaa tidhi. Dabadeed hadalkii ayay si wadatay,”

“Waxaa laga yaaba in aad idinku jaceshihiin su’aasha xigta in ay ka fiicnaato. Imisa qof oo halkan joogta ayaa u malaysa dadka kale in ay ka cabsadaan isbadalka?”

Si muuqata ayuu qof waliba gacantiisi kor u taagay. Dabadeed waxa ay bilaabeen in ay qoslaan.

“Maxay taasi annaga noo sheegi kartaa?”

“Is-diidsiin,” Nathan ayuu ku jawaabay

“Xaqiiqdii,” Micheal ayaa qiray. “ mar-mar annagu xitaa ma ogin inaan annagu cabsanayno. Anigu waxa aan ogahay inaan ka war qabin inaan cabsanayo. Markii aan maqlay sheekada waxa aan jacelaaday su’aasha: Haddii aadan cabsanaynin talow maxaa aad samayn lahayd adigu?

Dabadeed, Jessica ayaa ku dartay, “Hagaag, waxaa anigu ka helay sheekada isbaddalku inuu meel kasta ka dhacayo waxaan samayn doonaa wax fiican marka anigu awooddo inaan isku diyaariyo isbaddalka si deg deg ah.”

“Waxa aan xasuusta sannad ka hor markii shirkaddeennu ibinaysay Qaamuuskeen weyn si jumlad ah, hal qof ayaa isku dayay inuu noo sheego inaa ku shubno qaamuuska weyn koombitar dabadeed si tafariqa u iibino. In dib loo tifatiro way dhib yaraani, qiimo yarna wayku bixi, qofkasta wuu awooddi karaa inu helo qaamuuska. Laakiin dhamaanteen waan ku gacan saydhnay.”

“Maxaa ugu gacan saydheen?” Nathan ayaa waydiiyay.

“Sababtoo ah, waxa aan aaminsanayn laf-dhabarka ganacsigeenuu inuu ahaa xoogga dilaalinteenna. Kuwaas waxsoosarkeena gaadhsiin jiray suuqa oo dhan, laakiin faa’iido badan ayaa ka heli jireen waxsoosarkeen. In muddo ah ayaan ganacigan guula ka

gaadhnay waaxaan kaloo u haysanay inay waligeed sii socon doonto.”

Laura ayaa tidhi, “laga yaabaa taasi waa waxay uga dhignayd sheekada dhexdeeda Hem iyo Haw guushoodii isla weynida lahayd. Ma ogayn inay u baahanyihiin inay baddal waxa ay ka shaqayna jireen.

Nathan ayaa yidhi, “sidaas-darteed waxa aad u malaynaysay burcadkaagi hore inuu ahaa burcadka kaliye adigu leedahay.”

“Ha, annagu waxa aan rabnay inaa haysano burcadka.”

“Markii dib uga fikiro waxii annaga nagu dhacay, waxaan arkaa taasi kaliya inay ahayn inay ‘qaadeen burcadkii’ laakiin ‘burcadku’ inuu wakhti u gaar ah leeyahay ugu dambeyntiina dhammaanayo ama go’ayo.”

“Si kastaba ha ahaatee, annagu isma aynu baddalin. Laakiin tartamayaashi ayaa isbadalay beeceenii ayaa si xun hoos u dhacay. Waxaan ku dhex jirnay wakhti adag. Hadda, mid kale oo isbaddal taknoolejiyeed oo aad u weyn ayaa ka dhacayay shirkadda gudaheeda. Hal qofna shirkadda ka mid ahna uma muuqaato inuu rabo inuu maareeyo isbaddalka. Tanina uma muuqato arrin wanaagsan. Waxa aan u malaynayaa inaan shaqada mardhaw iska tagi doon.”

“Waa wakhtigii xerada luuq-luuq leh!” Carlos ayaa ku dhaqaaqay. Qofkasta qoslay, Xitaa Jessica.

Carlos ayaa u jeestay dhinaca Jessica wuxuuna ku yidhi, “Aad ayaa u fiicantahay haddii adigu awoodid in aad naftaada ku qosashid.”

Frank ayaa soo jeediyay, “Taasi waa waxa aan ka helay sheekada dhexdeeda. naftayda si dhab ah ugu dabiqi. waxaan ogahay sida Haw isu baddalay markii isagu ugu dambayn naftiisa ku qoslay iyo wuxuu isagu samayn jiray. Isagu isma waydiin in lagu magacaabi jiray Haw.

Kooxdii ayaa hoos u gunuunucday.

Angela ayaa waydiisay, “Maad u malaysiin Hem inuu wali isbaddalay dabadeed uu helay burcad cusub?”

Elaine ayaa tidhi, “Anigu waan u malaynayaa in uu sameeyay isbaddal.”

“Anigu uma malaynayo,” Cory ayaa yidhi. “Qayb dadka ka mid ah waligood isma baddalaan kadibna abaalkood ayay la kulmaan.

Waxaa arkaa dad sida Hem oo kala ah xirfadayda caafimaadka dhexdeeda. Waxa ay dareemaan inay la qabsadeen ‘burkadkooda’. waxay dareemaan siday yihiin dhibanayaal marka burcadka laga qaado waxayna edeyaan dadka kale. Way ka

xanuun badanyihiin dadka isla markaas faraha ka qaado oo isbaddal.”

Dabadeed Nathan ayaa si hoose u yidhi, isaga oo u malaynayo inuu naftiisa lahadlayo, “Anigu waxa aan u malaynayaa su’aashu inay tahay, maxaan annagu u baahanahay si aan faraha uga qaadno iyo maxaan annagu u baahanahay si aan isku baddalno?”

In muddo ah hal qofna waxba muusan dhihin.

“Anigu waa inaan qiraa,” Nathan ayaa yidhi, “waxa aan arki jiray waxa ku dhacayo bakhaarada kuweena oo kala ah ee ku yaalo qayb ka mid ah wadanka, laakiin waxa aan rajaysanayay tani inay annaga na saamaynaynin. Waxa aan u malaynayaa inay aad u fiicantahay in isbaddalka la billaabo markii aad adigu awoodid halkaad isbaddalka ka falcelin lahayd ama aad isku diyaarin lahayd. laga yaaba Annagu waa inaan iska qaadna burcadkeenna.”

“Maxaad u jeedaa?” Frank ayaa waydiiyay.

Nathan ayaa u jawaabay “Anigu waxba kama qabankaro laakiin waxa aan iswaydiiyaa halkee maanta joogi lahayn haddii annagu iibin lahayn bootooyinka bakhaaradeeni hore ku yaaleen kadibna aan dhisin lahayn hal bakhaar oo aad u weyn si aan ula tartamno.”

Laura ayaa tidhi, “laga yaabaa taasi waa wuxuu Haw u jeeday markuu isagu darbiga ku qoray “U barar khatarta lana soco burcadka”

Frank ayaa yidhi, “Anigu waxa aan u malaynayaa shayda qaar in labaddalo ma aha. Tusaale ahaan anigu waxa aan rabay inaan ilaashado sharaftayda. Laakiin waxaan xaqiiqsaday ka si fiicnaan haddii la socdo burcadka.”

“Hagaag, Michael, waxa ay ahayd sheeko yar oo aad u fiican,” Richard, shakilowgii fasalka, ayaa yidhi “laakiin sidee baad sheekadan ugu isticmaasheen shirkaddiina dhexdeeda?”

Kooxdu wali ma oga, laakiin Richard xogaa isbaddal aha ayaa naftiisa ku dhacay, dhawaan xaaskiisi ayay kala tageen. Isagu hadda waxa uu isku dayay inuu dheelitiro shaqadiisa iyo korniinka ubadkiisa.

Micheal ayaa ugu jawaabay, “Waad ogtahay, anigu inaan u malaynayan shaqadaydu inay tahay oo kaliya maareeynta dhibtaaad maalin laha ah sidaaday noogu dhacan. Laakiin waxa aan anigu sameenayay inaan fiiriyo mustaqbalka iyo sidaan uga taxadari lahayn halkaan annagu tagayno.

“Wiil ayaa maareeyay dhibaatooyinkii- labatan iyo afar sacaadood gudahood, anigu dad badan oo itaageero ma lahayn. Waxaan noqday jiir godkiisa ku jiro, waa ka soo dhex bixi waayay.”

Laura ayaa tidhi “Adigu waxa ayaad maareeynaysay markii ahayd inaad noqoto hoggaamiye.”

“Dhab ahaantii,” Micheal ayaa yidhi “Dabadeed markaan anigu maqlay sheekada Yaa Qaatay Burcadkaygii? Waxa aan xaqiiqsaday shaqadaydu inay ahayd inaad sawirto ‘burcad cusub’ taasi annagu dhammaanten u halgamayno. Sidaadan annagu ugu raaxaysano isbaddalka iyo guusha hadday noqo lahayd shaqada ama nolosha dhexdeeda.

Nathan ayaa waydiiyay, “Maxaad adigu ku samayseen shaqada?”

“Hagaag, markii aan waydiiyay shaqaalaha shirkadeena keebay ahaayeen sheekada dhexdheeda, waxa aan arkayay inaan lahayn afartii noole ba shirkadeena dhexdeeda, waxa aan arkayaa Sniff, Scurry, Hem iyo Haw midkasta wuxuu u baahanyahay in si duwan lagula dhaqmo.

Sniff-deenu waxa ay awooddan inay baraan isbaddalka suuqa dhaxdiisa ka dhacaya, sidaas-darteed waxa ay annaga naga caawiyaan inaan cusbaynaysiino himilada shirkada. Waxa ay nagu dhiirigaliyaan si aan u aqoonsano sida isbaddalka natiijadiisu u tahay waxsoosar cusub iyo adeega macaamiisheenu u baahanyihiin. Sniff-yadu waxa ay jacelyihiin isbaddalka waxayna noo sheegan iyagu inay ka helan shaqada taasi oo ah aqoonsashada isbadalka iyo la qabsiga.

Scurry-deenu waxa ay uu jacelyahay in wax la samayo, sidaas-darteed waxaa lagu dhiirigaliyaa ina ficil samayaan, ku salaysan himilada shirkadda ee cusub. waxa kaliyo u baahanyihiin in la illaaliyo si jiho khaldan u qaadin.

“Dabadeed waxa lagu abaal marin jiray ficilka ay iyagu noo keenan ‘Burcad Cusub’! waxa ay jacelaayeen inay ka shaqeeyaan shirkadda qiimaysa ficilka iyo maxsuulka (natiijo).”

“Ka-waran Hem iyo Haw-na ?” Angela ayaa waydisay.

“Nasiib-darro, Hem-yadeenu waa kula kaliye noo diidan inaan hore u socono,” Micheal ayaa ugu jawaabay. Waxa ay ahayeen kuwo aad u istiraaxsan ama kuwo aad uga cabsanayo isbaddalka. Qaar ka mid ah Hem-yadayada waxa ay isbaddalaan oo kaliya markay arkaan himilo muuqata taasi oo iyaga tusta sida isbaddalku faa’iido ugu leeyahay.

Hem-yadeenu waxa ay noo sheegen inay rabaan inay ka shaqeeyaan meel wanaagsan, isbaddalkana kaliya inay dareemaan. Laakiin Markay xaqiiqsadeen khadarta ayaa leedahay inan la isbaddalin, qayb kamid ah way isbaddaleen, shaqo fiican way samayeen. Himilada shirkaddu waxa ay naga caawisay in Hem-yadeenu inay isku baddalaan Haw-yo

“Maxaad ku samaysiin jirteen Hem-yada aan rabin inay isbaddalaan?”

“Shaqada ayaa ka cayrin jirnay,” Michael ayaa si murugo leh u yidhi.

“Anagu waxa aan rabanay inay no joogaan dhamaan shaqalaheenu, laakiin annagu waxa aan ognahay haddii ganacsigeenu si deg deg ah isku baddalin, dhamaanteen waxa aan ku sugnaanaynaa mashakil.

Dabadeed wuxuu yidhi, “warka ugu fiican wuxuu yahay Haw-yadeenu markii hore way laba-labaynayeen, waxa ay ahayeen kuwo maskax-furan si ay u bartan wax cusub si ka duwana way u dhaqmayeen isla wakhtigaasna way la qabsanayeen isbaddalka si ay noo caawiyaan inaan guulaysano.

“Waxa ay shirkadda ugu soo biireen inay isbaddal fishaan si firfircoona isbaddal u raadiyaan. Sababtoo ah waxa ay fahansanyihiin dabeecadda binu’aadamka, waxa ay naga caawiyeen annaga sawirashada himilo dhab ah oo burcad cusub taasi oo ka dhigtay qofkasta inuu dareemo wanaag.

“Waxa ay noo sheegen inay rabeen inay ka shaqeeyaan shirkad taasi oo dadka siisa kalsooni iyo hab la isku baddalo. waxay naga caawiyeen inaan si wadno kaftankeeni markaan raadinaynay burcad cusub.”

Richard ayaa ka hadlay, “Adigu ma sheekada yar ayaa dhammaan wax ka heshay?”

Michael wuu dhoolla-cadeeyay, “Sheekada ma ahayn, laakiin waxa aan annagu samaynay wuxuu ku salaysanaa waxa aan annagu ka baranay sheekada.”

Angela waxa ay qirtay. “Anigu waxaa u yar ekahay Hem, ani ahaantayda, qaybta ugu awoodda badan sheekada waxa ay ahayd markii Haw ku qoslay cabsidiisa iyo markuu ku sawirtay sawirka maskaxdiisa gudaheeda halkaasu arkay naftiiso ku raaxaysanayso ‘burcad cusub’. Tani waxa ay ku sababtay inuu tago xerada luuq-luuqa leh isago cabsi yar leh aadna u faraxsan. Ugu dambeyntina si fiican ayuu u maareeyay. Taasina waa waxa aan anigu rabo inaan sameeyo had iyo jeer.”

Frank illaa gaws-dambeedka ayuu ka qoslay. “Xataa Hem-yadu mar-mar waxa ay arki karaan faa’iidada isbaddalida.’

Carlos ayaa qoslay,“Sida faa’iidada inay ilaashadan shaqadooda.”

Angela ayaa ku dartay, “Ama xataa helida korin fiican.”

Richard, kaasi oo waj-kuududayay xilliga wada sheekaysiga ayaa, yidhi, “Maamulahayga ayaa aniga i sheegay shirkaddeenu inay u baahantahay isbaddal. Anigu waxa aan u malaynayaa waxa ay xaqiiqdi iyadu ishagaysay ma baahi isbaddal baa? laakiin ma rabin inaan maqlo hadalkan. Siday illa tahay; xaqiiqdii maan garanaynin waxa ‘Burcad Cusub’ ahaa, ma waxay isku dayaysay inaan annaga na baddasho, hadaba side faa’iido uga hel karaa isbaddalka?

Dhoolla-cadayn yar ayaa Richard wajigiisa ka soo muuqatay sidaadu u yidhi, “waxaa igu waajib ah inaan qirto inaan jacelahay fikradan arkid ‘Burcad Cusub’ iyo sawirashada naftaado ku raaxaysanayso ‘Burcad Cusub’, fikradan wax waliba way iftiimisaa, markaad adigu aragtid sida shayda wax fiican uga dhiga karto, adigu aad ayaad u sii xisayn isbaddalku inuu dhaco.

“Waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalo tan noloshayda shaqsi,” isagu ayuu ku daray. “Carruurtayduu waxa ay u muuqdaan inay u malaynayaa waxba inay noloshooda weligeed iska baddalaynin. Siday ila tahay waxa ay u dhaqmayaan sidii Hem oo kale – way xanaaqsanayeen. Iyagu malaha waxa ay ka cabsanayeen waxaa mustaqbalka noqo lahaayeen. Laga yaaba anigu u ma sawirin sawirka xaqiiqda ah ee ‘Burcad Cusub’ sababto ah aniguba naf ahaantayda ma arkayn.”

Kooxdii waa yar aamuseen maxaa yeelay dhowr qof ayaa ka fikirayay noloshooda khaaska ah.

“Hagaag,” Jessica ayaa tidhi, “badi dadka halkan jooga waxay ka hadlayeen shaqooyinkood, laakiin markaan anigu dhagaysanaya sheekada, anigu sidoo kale waxaan ka fikirayay noloshayda shaqsi. Waxa aan u malaynayaa xidhiidhka jaceylka hada leeyahay inuu yahay ‘Burcad Hore’ kaasi oo leh dhir yar-yar oo qurux badan.”

Cory ayaa qoslay isagoo ku raacay hadalkeeda “Aniguna sidoo kale, aniguna malaha waxa aan u baahanahay inaan faraha ka qaado xiriirka jaceylka ee xun.”

Angela ayaa ka soo horjeesatay, “laga yaabaa ‘Burcadka Hore’ waa dabeecad hore. Waxa aan annagu dhab ahaan u baahanahay waa inaan faraha ka qaadno dabeecada taasi oo sababayso xiriirka jaceylkeen oo xun. Dabadeed isbaddalnaa wado fiican oo u fikirno iyo ficilba u samayno.

“Aga!’” Cory ayaa ku falceliyay. “fikir fiican, burcadka cusub waa xiriir jaceyl oo cusub oo la la sameeyo qofkii hore.”

Richard ayaa yidhi, “Anigu waxa aan bilaabayaa inaa ka fikiro wax ka badan wixii aan malaynayay. Waxa aan jacelahay fikirada ina faraha laga qaado dabeecadihi hore halka faraha laga qaadi

lahaa xiriirka jaceylka. Ku dhaqmida dabeecad isku mid ah waxa ay ku dhaxalsin doontaa natiijo isku mid ah."

Illaa Wakhtigay shaqadu socotay, waxaa laga yaaba halkaan shaqada baddalay, waxa ay ahayd inaan baddalo wadada anigu u qabanayo shaqadayda. Malaha hada boos fiican ayaan haysan lahaa haddii aan wadada shaqada u qabanaayay baddali lahaa.

Dabadeed Becky, taasi oo ku noolaa magaalo kale laakiin u timid midowga ardayda, ayaa tidhi, "Intaa dhagaysanayay sheekada iyo qofkasta oo ka faallo bixiyay sheekada, anigu naftayda ayaan ku qoslayay. Muddo badan waxaa ahaa sida Hem oo kale, laba-labayn iyo ka cabsi isbaddal. Anigu ma xaqiiqsan imisa qof oo kale ayaa tan samayn jiray sidoo kale. Waxa aan ka cabsi qabaa inaan u gudbiyay carruurtayda xitaa anigoon ogayn.

Sidaan anigu uga fikirayay, waxa aan xaqiiqsaday isbaddalku dhab ahaantii inuu kuu hoggaamin karo meel cusub iyo meel wanaagsan, inkastoo adigu aad ka baqaysid isbaddalka.

Waxa aan xusuusta waqtigii willkaygu dhiganayay dugsiga sare. Ninkayga shaqadiisi ayaa u baahnayd in aan ka guurno lllinois oon u guurno Vermont, wiilkaygu uu xanaaqay sababtoo ah wuxuu ka tagayaa saaxiibadii, wuxuuna ahaa xidiga dabaasha. Dugsiga sare ee Vermont ma lahayn kooxda dabaasha sidaas-

darteed ayuu noogu xanaaqay in aan kaga dhignay qasab inuu nala guuro.

Markaan tagnay, waxa uu jeclaaday buuraha Vermont, wuxuu la-qabsaday ciyaarta barafka wuxuu u ciyaari jiray kooxda kulliyadiisa. Hadda wuxuu ku noolyahay si farxadle Colorado dhaxdeeda.

“Haddii aan dhamaanteen ku raaxaysano si wada jir ah sheekada burcadka, annagoo haysana koob jukoleed kulul, waxa aan awoodi lahayn in aan ka badbaadino qoyskeena walwalka faraha badan.”

Jessica ayaa tidhi, “Waxa aan tagayaa guriga si aan ugu sheego qoyskayga sheekadan. Waxa aan waydiin doonaa carruurtayda qofkay iyagu umalaynayaan anigu in aan ahay – Sniff, Scurry, Hem iyo Haw iyo qofkay iyagu dareemayaan in ay yihiin. Annagu waxa aan ka wada hadli doonaa waxa aan dareemayno in uu yahay burcadkii hore ee qoyskeena iyo wuxuu noqon doono burcadkeena cusubi.”

“Taasi waa fikir fiican,” Richard ayaa yidhi, isagoo ka yaabinaya qofkasta - xataa naftiisa.

Dabadeed Frank ayaa ka hadlay, “Waxa aan u malaynayaa in aan noqonayo sida Haw oo kale la soco burcadka iyo ku raaxayso burcadka! Anigu waxa aan u gudbin doonaa sheekadan

saaxiibbaday kuwaasoo ka murugaysan in ay ciidanka xoogga dalka ka baxaan isbaddal sideeya ayay uula muuqan doontaa. Tani waxay inoo hoggaamin doontaa wada sheekaysi aad u xiisa badan."

Micheal ayaa yidhi, "Hagaag, taasi waa sidaan u hormarinay ganacsigeena. Annagu waxa aan yeelanay dhowr wada sheekaysi oo ku saabsan waxaa annagu ka helnay sheekada burcadka iyo sidaan annagu ugu isticmaali lahayn sheekada marxaladeena. Wada sheekaysigu aad ayuu u fiicnaa sabatoo ah taasi madadaalo ayay annaga noo tahay in aan u isticmaalno si aan uga hadalno sidaan u maareeynayno isbaddalka. Waxay ahayd mid miro-dhal ah, khaasatan markay ku fido si qoto dheer leh shirkadda dhaxdeeda."

Nathan ayaa waydiiya, "Maxaad ka wadaa 'Qoto-dheer'?"

"Hagaag, markaan gudaha u sii dhaxgalnaba shirkadeena, dad badan ayaan annagu helnaa kuwaaso dareema awood lahayn, waxaa laga dareemayay iyagu inay aad uga cabsanayeen waxa isbaddalku ku keeno, sidaas-awgeed isbaddalkay iska caabinayeen.

"Si kooban, isbaddalka khasabka ah waa isbaddalka laga soo horjeestay.

“laakiin markii sheekada Burcadka la wadaagnay qof kasta shirkadeen ka mid ah, waxay naga caawisay isbaddalka iyo wadada annagu ka eegaynanay isbaddalka, waxay naga caawisay qofkasta inuu isku qoslo, ama ugu yaraan inuu dhoolla-cadayo, cabsidoodi hore markay isbadalayso.

Anigu waxa kaliya oo filanayay inaan maqlay sheekada burcadka si degdeg ah.

“Siday ku timiday?” Carlos ayaa waydiiyay.

“Sababtoo ah wakhtigaas annagu wakhti ayaa u helaynay, inaan maareeyno isbaddalka. Ganacsigeeni mar hore si xun ayuu kacay shaqalaahiina waan fasaxnay sidaan hore u idhi, waxaa ku jiray dhowr saaxiib oo fiican, tani aad ayaa nogu adkayd. Si kastaba ha ahaatee, kuwii shaqada ka taga iyo dhamaan kuwii joogay shaqada waxay yidhaahdeen sheekada burcadka way na caawisay si ka duwan ayaa wax u arkeen ugu dambayntii isbaddalkii ayaan maareeynay.

Kuwa hadda doona shaqo cusub inay raadsadaan waxa ay dhaheen aad ayaa u adkayd markii hore laakiin xasuusashada sheekada ayaa si weyn u caawisay.

Angela ayaa waydiisay “Maxaa inta badan iyaga caawiyay?”

Michael ayaa kugu jawaabay, “Ka bacdi markay ogaadeen cabsidoodi, waxay I sheegeen wax ugu fiican ay xaqiiqsadeen

inuu yahay banaanka burcad cusub ayaa jiro, kaasi sugayo in la daahfuro.”

Waxa ay dhaheen sawirashada sawirka burcad cusub maskaxdooda dhexdeeda- waxay naftooda ku arkayeen iyagoo shaqo cusub si fiican u qabanayo- tani waxay ku sababtay inay dareemaan wanaag, tani waxay ka caawisay interviewga shaqada. Dhowr qof ayaa helay shaqo fiican.

Laura ayaa waydiisay, “Ka waran dadkii ku haray shirkadiina?”

“Hagaag” ayuu Michael dhahay, “Halkay ka cabsan lahayeen isbaddalka kaasi oo dhacayay, dadku hadda waxay dhahaan. ‘Iyagu hadda waxay qaateen burcadkoodii. Bal aan raadsano burcad cusub, tani waxay u badbaadisaa wakhti badan iyo waxaa yaraysaaa walwalka.”

“Isla markii ba, dadkii iska caabinayay isbaddalka waxay arkeen faa’iidada isbaddalka, xataa waxay ka caawisay inay isbaddal la yimaadaan.”

Cory ayaa yidhi, “Maxaad adigu u malaynaysaa iyagu inaay isku baddaleen?”

“Iyagu waxa ay isku baddalan ka dib caadidiska ah uga imaanaya isbaddalka shirkadeena .”

Isagu wuxuu waydiiyay, “Maxaa dhaco dhammaan shirkadaha a soo shaqayn jirtay marka maareeyuhu idin ogaysiiyo isbaddal? Badi dadku ma waxa ay dhahaan isbaddalku waa fikir fiican mise waa fikir xun?”

“Waa fikirad xun,” Frank ayaa ku jawaabay.

“Haa” Michael ayaa ku raacay. “Sabab”

Carlos ayaa yidhi, “Sababtoo ah dadku waxa ay rabaa shaykasta inuu sidiida iska ahaado waxa ay u malaynayaan isbaddalku inuu iyaga ku xumaan doono. Marka hal qof yidhaahdo isbaddalku waa fikirad xun, dadka kalana waxa ay yidhaadaan wax la mid ah.”

“Haa, iyaguu dhab ahaantii waxaa laga yaabaa inaysa dareemi Karin wadadaas,” Michael ayaa yidhi, “laakiin waxa ay kugu raacayaan si habboon, taasi waa nooc ka mid ah duufsiga kaasi naga dagaalamayo isbaddalka shirkaadeena dhexdeeda.”

Becky ayaa wayddiisay, “Sida ay wax ahaayeen ka dib dadku markay maqleen sheekada burcadka?”

Micheal ayaa si dhib yar u yidhi, “Duufsigi ayaa isbaddalay. Hal qofna muusan rabin in uu sida Hem oo kale noqdo!”

Qofkasta ayaa qoslay.

Iyagu waxa ay rabeen in ay ogaadaan isbaddalka isla waqtiga uu dhacay ka dibna ficil sameeyaan, halka ay ka laba-labayn lahaayeen ama iska indho tiri lahayeen isbaddalka."

Nathan ayaa yidhi, "Taasi waa fikir fiican. Hal qof oo shirkadeenna ka mid ah ma rabo in uu noqdo sida Hem oo kale. Iyagu xataa way isbaddaleen. Maxaad nooga sheekayn wayday sheekada kulankii hore ee dib u midowga ardayda? Tani way shaqayn lahayd.

Micheal ayaa yidhi, "tani way shaqaysaa."

"Tani waxa ay si fiican u shaqayn, dabcan, marka qofkasta oo shirkaddiinna ka mid ah uu yaqaaanno sheekada- ama ha ahaato shirkad weyn, ganacsiga yar, Ama qoyskaaga- sababta oo ah shirkaddu waxa kaliyo oo isbaddali kartaa marka dad ku filan shirkadda dhexdeeda isbaddalaan."

Dabadeed isagu waxa uu soo jeediyay hal fikirad oo ugu danbaysay, "Markii annagu aragnay siday annaga noogu shaqani, annagu waxa aan sheekada ugudbinay dadka annagu rabno inay ganacsi nala sameeyaan, annagoo og inay iyagu isdoo kale inay u baahanyihiin inay maareenayaan isbaddalka. Waxaa u soo jeedinay annagu inaan u noqono 'burcadkood cusub' shurako fiican si loo wada guulaysto, tannin waxay noo hoggaamisay ganacsi cusub."

Fikradaas Jessica waxa ay soo xasuusisay inay lahayd ballan wax kala iibsi aroorta hore. Waxa ay fiirisay sacadeed-gacanta waxayna tidhi, “Hagaag, waa wakhtigii aan ka tagi lahaa xarunta burcadka raadsan lahaana burcad cusub.”

Kooxdii way wada qosleen waxa ayna billaabeen in ay ismac-salaameeyaan. Dhammaantood waxa ay rabeen in ay sii wadaan wada sheekaysiga laakiin waxaa kaloo ay doonayeen in ay tagaan markay tagayeen waxa ay u sii mahadnaqeen Micheal mar labaad.

Isagu wuxuu yidhi, “Anigu aad ayaan ugu faraxsanahay inaad sheekada ka heshaan faa’iido waxaan kaloo rajaynayaa in aad heshaan fursad aad kula wadaagtaan sheekadan dadka kale si dhakhso ah.”

LADH



Ladh.1. Jillaayaasha sheekada Sniff, Scurry, Hem Iyo Haw



Ladh.2. Cheese (Burcad ama Farmaajo)



Ladh.3. Maze (Xero luuq-luuqleh)

DHAMMAAD